# GEEDDIGA WADAAY !



**JAMHURIYADDA DIMOQRADIGA SOMALIYA**

**WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE**


# GEEDDIGA WADAAY


**W. Qoray :**

**Cabdi Muxumud Aammin**



**MUQDISHO — 6/12/1973**

# *A R A R*

*Waxaa nasiib wanaag ii ah, inay maanta ii suuro gashay, inaan qoro wixii aan murti tirinayey sanooyin badan, una soo gudbiyo dadweynaha Soomaaliyeed, siduu uga faa'iidaysan lahaa murtidaydii. Haadii ayan jiri lahayn far qoran waxyaalahaasi halis waxay u ahaayeen, inay wada lumaan oo dabaysha raacaan. Mahad waxaa leh kacaankeenna hantiwadaagga ah oo uu hooggaaminayo Aabbaha Ummada Soomaliyeed, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Jaalleyaashiisa Golaha Sare ku jira oo daacad ugu shaqaynaya dadweynaha Soomaaliyeed. Qorista Afkeenna hooyo, waxay ina ka xoraysay Afafkii iyo dhaqankii shisheeyaha ee suugaanteenna horukaceeda hor istaagnaa. Qorista Afku waxay inoo furtay, in wax alla wixii maskaxda dadka Soomaaliyeed ku gaaxday oo dhan, bannaanka la soo dhigo. Waxaa la gudboon hobollada Soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaanna, kuwa taariikhda ku leh fanka ummada, inay Qoraan murtidoodii, si ay Carruurta soo koraysa ugu indho dillaacsadaan, kuwa dhalan doonana dhaxal uga heli lahaayeen oo ay ku ogaan lahaayeen qiimaha murtidooda, fankooda iyo hiddahooduba heerkay ka soo mareen ilbaxnimada adduunweynaha iyo taariikhdaba.*

*Waxaan mahad weyn u celinayaa Akadeemiyaha Dhaqanka ee Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare. Mahad jaallenimo ah haddana, waxaan u celinayaa Qaybta Suugaanta ee Akadeemiyaha oo iga kaalisay dhinaca farsamada iyo iskudubbaridda buuggan. Jaalle Faadumo iyo Cabdi Maxamed oo iga caawimay garaacista makiinadda iyo dedejinta buugga, iyana mahad weyn ayay iga mudan yihiin.*

Jaalle C. M. Aammin

# *TUSMADA BUUGGA*


| | | |
|---|---|---|
| *Nolosha hoobalka Cabdi Muxumad oo soo kooban* | *Bog.* | *6* |
| *Illobimeynno taariikhda* | » | *7* |
| *Maxaa loo dig iyo damleeyahay* | » | *3* |
| *Tolweynaha* | » | *9* |
| *Bari waa iftiin* | » | *10* |
| *Shayddaan Maroole (gabay)* | » | *11* |
| *Dadkaaga dhinac ka raac* | » | *13* |
| *Aammus iyo dhaygag (gabay)* | » | *14* |
| *Hantiwadaagga cilmiga lagu habeeyey* | » | *16* |
| *Xanay ku har xaasidow ku jab* | » | *17* |
| *Faannoole* | » | *18* |
| *Waynnu guulaysan doonnaa* | » | *19* |
| *Hawsha maantu waa horukacii berrito* | » | *20* |
| *Dhulka dhulka* | » | *21* |
| *Caynaanka hay* | » | *22* |
| *Codka Macallinka* | » | *23* |
| *Ururka caafimaadka* | » | *25* |
| *Ma doonayaan* | » | *26* |
| *Baadida (gabay)* | » | *27* |
| *Kol haddaan hantiyey* | » | *28* |
| *Waa inaynnu* | » | *29* |
| *Cilmiga barta* | » | *30* |
| *Dhallintoy dhammideen* | » | *31* |
| *Xaaraan quutayaashii* | » | *32* |
| *Allahu akbar* | » | *33* |

*Isticmaarku dhulkeennii* . . . . . . Bog. 35
*Geeddiga wadaay* . . . . . . . » 37
*Soo dhaqaaqa* . . . . . . . . » 38
*Kuwa daanka buuxsadey* . . . . . » 39
*Hoy Jabuutaay* . . . . . . . » 40
*Way garanayaan* . . . . . . . » 41
*Adduunyaada nin haabtow* . . . . . » 42
*Ma anoo dhulkaygii* . . . . . . . » 43
*Guntaadey* . . . . . . . . . » 44
*Afrika ha kacdo* . . . . . . . . » 46
*Waa inaad Diyaalow u digtaa Amxaarada* . » 47
*Bal dhowra dhowray* . . . . . . . » 48
*Kuwii hore inoo gubey haddana haw gar-gaarina* . . . . . . . » 49
*Afmiishaar* . . . . . . . . . » 50
*Ha hakannina* . . . . . . . . » 52
*Kol haddii guulaysteyaal geeddigii la waday* . » 53
*Dharkeenna iyo dhuunigeenna* . . . . » 54
*Taariikhdu waa dhaxal* . . . . . . » 55
*Dagaalkii Dhagaxtuur 1947* . . . . . » 55
*Kacaankii 21 Oktoobar 1969* . . . . . » 57
*Jaalle Siyaad 21-10-1971* . . . . . . » 58
*Heesta xoogsatada adduunka (internasiyonaal)* » 60

# NOLOSHA HOOBALKA CABDI MUXUMAD OO SOO KOOBAN

Jaalle Cabdi Muxumad waa hoobal caan ah oo la wada yaqaanno. Fanyahanku wuxuu ku dhashay gobolka Waqooyi-Galbeed, taariikhdu markay ahayd 1935, magaalada Gabiley. Hooyadiis isagoo yar ayay dhimatay, hase yeeshee, waxaa soo koriyey ayeydiis Murriyad. Shaqada fanka wuxuu ka bilaabay magaalada Hargeysa, sannadku markuu ahaa 1953. Isla sannadkaas ayuu u soo wareegay magaalamadaxda Jamhuuriyadda Soomaaliya Xamar. Heerarkii halgannada la soo maray tan iyo intii kacaankeenna hantiwadaagga ahi uu ka curtay, Jaalle Cabdi Muxumad har iyo habeen wuxuu heeggan u ahaa daafacidda dalka. Isagu wuxuu aad iyo aad uga soo hor jeedaa gumeysiga cusub, dibusocodka iyo dabadhilifyada gumeysigu ku shaqaysto. Murtidiisu waxay baabi'inaysaa hantigoosadka, musuqmaasuqa, eexda, qaraabakiilka iyo qabyaaladda. Tixdii isaga ugu horreysey waxay ahayd «Dhulyohow......» oo uu tiriyey markii gobol dalkeenna ka mid ah «Hawd iyo riseef eeriya» uu gumeysigu gacanta u geliyey gumeysiga Xabashida 1953. Waayihii musuqmaasuqa 1960-1969, wuxuu ka tiriyey heeso badan oo uu kaga soo hor jeeday dawladihii musuqmaasuqa ahaa. Heesahaas waxaa ka mid ah «Kuwa daanka buuxsaday.....».

1969kii, 21kii Oktoobar, markii Kacaankeenna Hantiwadaagga ahi uu inoo dhashay, Jaalle Cabdi Muxumad wuxuu u riyaaqay oo taageero buuxda siiyey isbeddelka ka dhacay dalkeenna. Heesaha caanka ah oo uu ka tiriyey Kacaanka, waxaa ka mid ah, «Xaaraan quuteyaashii.....!» iyo heesta kale oo dadweynuhu wada aqaanno «Caynaanka hay......! Weliga hay.......!».

Waddaninnimadiisa iyo halgankiisa awgood ayaa hoobalka abaalgud loo siiyey billad sharaf 1971dii.

Dalalka uu hoobalku tegay waxaa ka mid ah Shiinaha Dadka, Bulgaariya, Jamhuuriyadda Dimoqradiga ee Jarmalka iyo kuwo kale.

Inkastoo tan iyo intii kacaankeennu curtay, wixii go'aanno la gaaray ay wax wada taariikh leh ahaayeen, danaha ummaddana faa'iido u wada lahaayeen, haddana wacdarro gooniya, oo kacaankeennu gaaray waxay ahayd qorista Af Soomaaliga. Sababtoo ah ummadina hore uma mari karto haddaysan lahayn aqoon. Aqoontuna waxay ku xirnayd in Afkeenna la qoro. Muddo aad u dheer ayaa la sugayey Tawradda ka hor wax badan in afka la qoro, hase yeeshee, oraah ma dhaafi jirin. Maxaa yeelay awalba khayaano loola jeeday ayay ahayd. Qofkii xor ah ayaa wuxuu doono sameeya, haddeese ma ahaayeen kuwo xor ah? Maya! Xagga mabda'a xor kamay ahayn oo habka hantigoosadku uma oggolayn, maxaa yeelay marka wax la wada barto waa sinnaan, mabda'aasina ma oggola sinnaanta. Marka kale, gumeystihii ay baryi jireen ma oggolaayeen in afkeenna la qoro? Maya! Heestani sidaasay u sheegaysaa inaynnaan illoobayn taariikhda. Taariikhduna ayan wax illoobayn, haddaan innagu wax illowno.

## ILLOOBIMAYNNO TAARIIKHDA — 17-1-73

Illoobimaynno taariikhda, Illoobimayso taarikhdu
Ayaantii afkeennu, addoonsiga ka baxay
ee uu ahaaday kii arlada lahaa.

Illoobimaynno taariikhda, Illoobimayso taariikhdu

Ayaantii ubadkeennu, addoonsiga ka baxay
ee uu ahaaday kii af qoran lahaa.

Illoobimaynno taariikhda, Illoobimayso taariikhdu

Ayaantii aan itaalka, awooddayada ogaannay,
ee aynnu erinay eray nin kale lahaa.

Illoobimaynno taariikhda, Illoobimayso taariikhdu

Ayaantii Oktoobar ilayskii, ka baxayey uu noo ahaaday
kii jahliga eryaday.
Illoobimaynno taariikhda, Illoobimayso taariikhdu

* * * * * *

Jaallayaal gumaystuhu waa weer, maxaa wacay weerku hadduu ari kaasoo dhexgalo, waxa caado u ah hadba dhankaad ka bixiso maahee, dhanka kaluu ka soo galaa, oo waa dhib ka saariddiisu. Waxaa kaloo caado u ah xaasidnimo, maxaa yeelay, hadduu boqol neef soo dhexgalo, inuu wada laayo mooye kama tago. Gumeystuhu sida weerka ama (dhidarka) ayuu laablaab badan yahay, oo markaad albaabka ka saarto daaqadduu ka soo galaa, mana jecla, in dalalka soo koraya siiba Afrika ay hore u marto, inay midoobaan, inay wax bartaan iyo dhammaanba wixii guul u keenaya. Haddaba wuxuu inaga doonayaa inaan midiidin u ahaanno oon amarradiisuun ku soconno. Wax uusan raalli ka ahaynna aynnaan yeelin. Wuxu inoo diidayaa, in dalkeenna uu qaybiyey uu isu tago, oo calan keliya dadkeenna uu ku hoos noolaado. Waxa kaluu diidayaa in dadkeennu wax wada barto, si aan uga kaaftoonno inaan had iyo jeer waydiisanno qaar wax na bara ama wax na tusa (Esperti). Ulajeeddadiisu waa, in had iyo jeer loo baahnaado gacantana loo hoorsado goor walba.

## MAXAA LOO DIG IYO DAMLEEYAHAY — 17-3-73

*Maxaa loo dig iyo damleeyohoo gumaysi doonayaa*
*Inaan dariiqa ka leexanna baa la doonayaa*
*Inaan gumaysiga daba gallaa baa la doonayaa*
*Inaan xumaato ku daa'imnaa baa la doonayaa*
*Inaynnu aammin darraysannaa baa la doonayaa*
*............... gumeysi diidayaa*
*Inaynnu isku duubanaannaa la diidayaa*
*Inaan danteenna aqoonsannaa baa la diidayaa*
*Inay dhasheennu dadka u ekaataa la diidayaa*
*Inaynnu dunida docuun ka raacnaa la diidayaa*
*.................. gumeysi doonayaa*
*Inaynnu gaajo ku daa'imnaa baa la doonayaa*
*Inaynnu cudurka dadkiis ahaannaa la doonayaa*
*Inaynnu garashada ka daahanaannaa la doonayaa*
*Inaynnu indhaha daboolannaa baa la doonayaa.*

Dibucosodku waxay yiraahdaan ma isticmaar baan iska celin karnaa, wuu xoog weyn yahaye, ama wuu xoolo badan yahaye, amaba wuu siyaasad badan yahaye; iyagoo inagu tilmaamayey inaynnaan waxba ahayn iyo iyagoo illowsan wax ka tabar yar isticmaarka inuusan jirin. Inta yar uu ku girifgirif leeyahay isagu waxa weeye iyaga oo kale oo uu ku shaqaysto. Geed baa wuxuu gudun ku yiri, «Haddaan gabalkay kugu jirin guduney imaad gooyseen». Haatan gumeyste ma jireen adduunka hadduusan kuwo dabadhilif ah oo qalbi daciif ah leh ku dhex lahayn ummadaha gumeysiga cusub ku dhex jira. Haddaba ha ogaadeen kuway abbaanka u ahaayeen xoog inaannu leenahay oo ah niyadda iyo maskaxda. Labadaas oo wax ka adkaan karaa ayan jirin adduunkoo dhan. Midda kale, waxaynnu leenahay saaxiibbo tira badan oo aduunka ku nool oo gumeysiga neceb, nabadgelyada iyo sinnaantana jecel.

*Tolweynaha hantiwadaagga ee ku kala hoyda,*
*Dunida hareeraheedaan hiil iyo hooba wadaagnaa,*
*U habranmaynno gumeysi habeedliyo kuwa ka hambaystoo*
*Madaxa hoos uga rogi maynno taariikhdaa na hagaysoo*
*Na hoggaaminaysoo waa hayaankii lagu kala haraayee*
*Hooy tolweynaha hantiwadaaggow heegan ahaada*
*Hunguri weyne ma hakanaayo keligii haystee*
*Ma hoyanaayo gacmaha is haystoo tolweynaha hantiwadaaggow*
*Heegan ahaada.*

* * * * * *

Bari waa meesha qorraxdu ka soo baxdo. Haddaan subaxdii waagu ka soo iftiimin bariga, bal qof walawba qiiyaas, sida hawlaheennu ahaan lahaayeen. Bari waa meesha wax waliba ka yimaadeen Nebiyadii iyo diinuhuba. Marka waxaan garan karnaa in wax kasta oo nolosha bini'aadmiga ka mid ah ay ka yimaadeen. Sidaa awgeed sidii caadada u ahayd tan iyo intii adduunku jirayba, bari waxaa ka yimid mabda'a hawl iyo hantiwaddaagga ah. Kaasoo u noqday dadka adduunka

qorrax cusub oo u soo baxday mabda'aasoo la diriraya xaqdarrada, caddaalad la'aanta, iyo isku kor noolaashada qofqof korkiis ku nool yahay. Soomaaliya xaggee bay deggan tahay? Geeska Afrika ee Bari iyo Badweynta Hindiya oo ay dhinaca ku hayso, sidaas darteedna iftiinka bari wuu inooga soo horreeyaa Afrikada kale. Soomaaliya iyadoo karaamadaa bari la wadaagta ayay doorantay dariiqa hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, oo ay goosatay inay hororrada dhiigyacabka ah ee hantigoosatada ah yur tiraahdo, oo aynnu la dagaallanno innagoo ku heesaynna bari waa iftiin. Ummadaha reer bari qaar waxay yiraahdaan, Bari waa casaan ama guduud. Taas oo ah subaxdii cadceeddu markay soo baxayso way guduudan tahay; marka labaadna waxay tahay xorriyadda dhiig baannuu ku helnay iyo daagal, dhiig baannaan ku ilaalinaynnaa Mayd maxaa u dambeeyey? Kaas la sii sido. Fietnaam keliya ka soo qaad. Immisay dagaallamaysay iyadoo xornnimo doonaysa, iyadoo midnimo doonaysa iyo iyadoo nabadgelyo doonaysa.

## BARI WAA IFTIIN — 14-3-73

Barwaaqada adduunyada, halkii laga bilaabe,
Baahida la dirirtee, baabi'isay weeyoo,

Bari waa iftiin

Haddaan qorraxdu soo bixin Badi hawlaheennaba,
Kama bogan karaynnoo, qabyo kama baxaynnee

Bari waa iftiin

Nebiyadii badnaa, Iyo wixii diino soo baxay,
Halkii ay ka beermeen, Barbarkaasi weeyoo

Bari waa iftiin

Booli quutayaashaa, Waa been yiraahdee,
Halkii buugga noloshiyo, Nuurku uu ka soo baxay
Babarkeenna weeyo.

Bari waa iftiin

Gumaysigu ha baaba'o,
Innagoon baqayn baan,
Buunka u afuufnee,
Iyo kii bahaystee
Hawsha u bareernoo,

Bari waa iftiin

## G A B A Y

### SHAYDDAAN MAROOLE — 25-4-1973

Jaallayaal waxaan wax badan maqallay madaxweynaheennoo ka hadlaya wadaad xume oo ina leh: «Wadaad xume iska ilaaliya». Haddaba iskama uu lahayne, wuxuu ogyahay, inuu biidhi qaate yahay wadaad xumuhu. Gumaysigu isaga ayuu ku soo gabbadaa, kitaab gaablowgu diintuu been ka shegaa. Haddaba qofkii wuxuu cuno siiya ayuu la jiraa, illayn waa mashaqaystee. Wuxuuna aammisan yahay, inuu ku qaraabto diinta oo uu ku baaryootamo isagoo weji xun. Bal aan taariikhda dib ugu noqonno. Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, markuu gumaysiigii Ingiriiska la dirirayey gabaygii uu kula hadlay wadaaddada bal wax yar aan ka soo qaadanno.

*«Awyaalow ma diiddeen janno inaw dareertaan,*
*Darmaan baad la duushiyo dawlad maad u fuushaan,*
*Warmo danani iyo seef degta maad ku qaaddaan,*
*Dawarsigu ma fiicnee qandiga mayska duubtaan,*
*Wanka doosha weyn iyo ma dagadaad u xilateen,*
*Dalkaba idin kaa lehe dawlad maad u noqotaan,*
*Illayn doqoni calaf male maxaa dulbaax ka baylahay».*

Haddii aan gadaal u eegno taariikhdii aynnu soo dhaafnay, markii ummadda Somaaliyeed dhallinyara dooda qaar ka midihi abaabuleen urur gobannimadoon ah, (SYL), wadaad xume ama sheyddaan maroole wuxuu ahaa inta wax ka sheegta intii ugu horraysey; Illaa ay ku tilmaameen ururkaas gaalo. Manta maxay leeyihiin? Wadaad xumeyaashu hantiwadaaggii waxaan run ahayn bay ka sheegeen oo ah diintuu ka hor

imanayaa. «Afkeenna markii la qoray, waxay yirrahdeen; waa la gaaloobay». Haddaba jaallayaal haddii ilaa waqtigaa tallabadii dadka nacfi u lehba ay ka hor tegayeen; miyaanay ka badnayn wax iyaga uun ka yimid oo ayan ka dhadhamayn dhagar shisheeye? «Wadaad xume wax garo».

— Sayid Maxamed Cabdulle Xasan,
— Sheekh Yuusuf Alkawneyn,
— Shekh Bashir,
— Sheekh Xasan Barsame,

iyo kuwa kale oo badaniba, wadaadday ahaayeen gobannimada jecel iyo horumarka dalkooda iyo dadkoodaba. Sheekh Yuusuf Alkawneyn wuxuu gartay, inaan dadna afkiisa looga roonayn inuu wax ku barto. Isagu muxuu yeelay? Alifkiibuu Af Soomaali ku baddaley. Alif la kor dhabey Alif la hoos dhabey, Alif laa goday. Sheekh Yuusuf diinta ma wax buu u taray, mise wax buu yeelay?

*Wadaadow adduunyada shirtee sharafta doonaysa,*
*Ee biraha ka shiishayee samada showraysa,*
*Ee nolosha shaac bixisayeen loogu sharaf sheegan,*
*Sagaalkii shin qaadka u ahaa shirib ma dheeraync,*
*Shaqa badatay uun bay qabteene sheeko may wadine,*

*Cilmigaa adduunyada shammiray sheeda ka arkeene,*
*Adiguna sharuur iyo bun baad soo shub leedahaye,*
*Wax kitaabku kuu sheegayaa inaad shahiidaaye,*
*Haddaanad hawsha dhinacaaga shubin Sheekh ma aad tihide,*
*Shayddaan maryoolow na dhaaf kuu Siyaad sheegay baa tahaye,*

*Shuqshuqda iyo beentaadu waa midan shaqaynayne,*
*Shimbiraha gumaysiga ayaan waraf ku shiidnaaye,*
*Shanigoodii baan kugu arkiyo shaarki tuugada e,*
*Haddaanad hawsha dhinacaaga shibin Sheekh ma aad tihide,*

*Shaydaan maryoolow na dhaaf kuu Siyaad sheegay baad tahay,*

*Tawrad baa dabkii noo shiddoo shuuqe xumihiiye,*
***Hawl aan la kala sheegan baa** shawrku marayaaye,*
*Shicbigii dhammaantii ogaa shar iyo khayrkiise,*
*Cadawgii wuxuu sheegayaa shag ma rogayaane,*
*Shirrabaad ayaan ugu jirraa shubatayaalkiiye,*

*Shiddo iyo kulayl bay xornimo sheegataa abide,*
*Haddaan dhididku shalakhlayn ma jiro shaah qof hela-yaaye,*

*Taariikhahaa sheegayoo shaahid loo yahaye,*
*Haddaanad hawsha dhinacaaga shubin Sheekh ma aad tihide,*

*Shayddaan maryoolow na dhaaf kuu Siyaad sheegay baa tahaye.*

## DADKAAGA DHINAC KA RAAC — 1-1-72

Kan hadba derbi ku laabanaya ee is leh laguma arkayow, ceel goofay baa biyo laga cabbaa iyo cimri tegey dib baa loo soo ceshaa waa calaacal timo ka soo baxeene caajiska ka toos oo nolosha cusub raac. Hadalkaasi wuxuu ku saabsan yahay kuwa leh, waxaan dadku helin baan heli jirey, waxaan dadku cunin baan cuni jirey, waxaan doonaana waan samayn jirey. Intaasoo dhan wada illow! Waayo, markaad adigu dhergeysay keligaa Soomaali weyn siday ahayd? Waxaa suurowda, in jawaabtu kugu adkaato, maxaa yeelay, maahmaah baa tiraahda «Nin dhergeni nin gaajaysan ma oga». Maanta waxaa laguugu yeerayaa inaadan dadka ka fongornaan. Kii dhuumanaayee, kii beente dhurayee runtu dhibaysow, kii dhoohanaayeen hadal dhacaynow waa dharaar lagu dhawrayaa! Waxaa ku dhawraya taariikhda, waxa ku dhawraya dadkaagii iyo dalkaagii. Yaan dugaaggu dibedda kugu cunine dadka soo raac. Hunnuhunnuda gumaysigu yay qalbiga kaa qaadin! «Af guduudintiisaad qosol gaar ah mooddee, waa lagu gabraariye adna garanba mayside cirdab laba galaanuu gacan kaaga jiidaye gacalkaa u soo jeesoo ha gunaanad seegine». Gabyaagii weynaa Cali Xuseen ayaa hadalkaas ku yiri kuwa gumaysiga u adeega.

Dhiig miirad inuu dhammaadoon, isku dheri ahaanno,
Dhiig miirad inuu dhammaadoon, isku dheerer ahaanno,
Dhiig miirad inuu dhammaadoon, isku dhumuc ahaanno
Dhiig miirad inuu dhammaadoon, isku dhogor ahaannaa loo dhaqaaqee.

Kii dhuumanaayeen dhabarku muuqdow
Waa dharar lagu dhowrayeye dadkaaga dhinac ka raac.

Hantiwadaaggu inuu dhisnaadoo, dhulku hodon ahaado
Hantiwadaaggu inuu dhisnaadoo, gartu dheelli tiranto
Hantiwadaaggu inuu dhisnaadoo, hawl loo dhaqaaqoo
Hantiwadaaggu inuu dhisnaadoo, cudurka aan dammaynnaa loo dhaqaaqee.

Kii dhuumanaayeen dhabarku muuqdaw
Waa dharar lagu dhowrayeye dadkaaga dhinac ka raac.

Hantiwadaaggu inuu dhisnaadoon, khayrkeen u dhigannoo
Hantiwadaaggu inuu dhisnaadoo, isticmaar dhammaadoo
Hantiwadaaggu inuu dhisnaadoo, dhammideen waxbarannoo
Hantiwadaaggu inuu disnaadoon, khayrkeen u dhiganna loo dhaqaaqee.

Kii dhuumanaayeen dhabarku muuqdow
Waa dharar lagu dhowrayeye dadkaaga dhinac ka raac.

## GABAY

### AAMMUS IYO DHAYGAG — 22-12-72

Soomaali wax walba horay uga hadashay. Waxa la yiri, «waxaa u daran qof aad kobahiisa toleysoo karfantaada tolaya!». Jaallayaal gumaysiga socda weligii isagoo socda arkimaysid, laakiin waxaad arkaysaa kuwo afkiisa ku hadlaya oo uu soo dirtay! Kuwaasina badanaaba, bannaanka isma soo dhigaan. Gumaystuhu isna qaar buu ku shaqaystaa oo uu weji kale ula yimaadaa. wejikaas waxaa ka mid ah qabyaaladda iwm. Haddaba qofka gaa-

jaysnaa, ee arradnaa, een wax aqoon, meel uu seexdana aan haysan, waa midka mabda'a hantiwadaaggu u dhashayee uu doonayo, inuu xoreeyo. Waa kan uu doonayo in hantiwadaaggu gaajada iyo cudurka inuu ka saaro, inuu jahliga ka saaro iyo inuu u soo celiyo dadnimadiisii laga dhacay oo uu qoorta kor u taago; isagoon cidna ka baqayn. Waa kan laga doonayaa, inuu si wanaagsan wax u gartaa, oo uu ogaadaa dantiisaa. Waxaa calool xumo leh, hadduu garan waayo, ama uu dhinaca kalaba ka soo jeesto, isagoo lagu shaqaysanayo oo xaalkiisu yahay ragga geela leh ragga daba yaal yaannu daba naal. Waa hambo suge, maxaase ku khasbay inuu hambo sugo isagoo hordhac helaya. Tixdani arrintaas bay ku saabsan tahay.

*Waxa aammus iyo dhaygag iyo yaab afkalahayn leh,*
*Mid addoonsi soo diray la garay oo iblays wado e,*
*Kuwa uurka waaweyn la garay ee cunay agoontiiye,*
*Sida eyga qaar daba ordoo tuuggu ku adeegto,*
*Afmiinshaar abeesana la garay oon arxamahayne,*
*Waxa aammuus iyo dhaygag iyo yaab afkala hayn leh,*
*Aqalkiisu miduu xaar yahoo oofta ka daloolo,*
*Awaaraha ka qaad kuu lahaa odayga Soomaali,*
*Asaagood ha gaadheen kuwuu u ishtihaadaayey,*
*Addoonsiga ha diideen kuwuu eedda ugu qaaday,*
*Arradka iyo gaajada ka saar aammuska u diiday,*
*Xooggiinna aammina baryadu aayatiin ma lehe,*
*Iskiin wax u qabsada goor kastaba ugu inshaaraayey,*
*Ha gaadheen iftiinkoo mugdiga yaanay ku abaadin,*
*Aqoon li'ida kala dirir kuwuu awlaxa u qaatay,*
*Unifersid qaar soo maray oo haysta agabteeda,*
*Iyo qaar iskuullada sarsare idilba soo dhaafay,*
*Inay suuqa eedadayeen waan ogsoonnahayee,*
*Wax la yiri afmiinsharraday amar ka qaataane,*
*Wax la yiri qabiilkii uray weli ag joogaane,*
*Wax la yiri isticmaarku miduu soo dirtay ehel ka yeeshaane,*
*Wax la yiri israacoodo qaar diiddan bay iihda la hayaane,*
*Mabda'ii ammaanka iyo lahaa aayahiyo khayrka,*
*Idilkiin wax wada cuna midkaa noo iftiminaya,*
*Wax la yiri dadbaa weli agmara oo aan aamminine,*
*Jaalkooda aadehe niyada uga adeegaaya,*

*Iyo kii afkana uga qoslaa belana aasaayaa,*
*Wax la yiri ilaa eeggada way isu egyiine,*
*Fulennimadu waa aayo xumo aan abda' lahayne,*
*Albaabkii gumaysigu mariyo eydi daba joogtay,*
*Ummadda waxeedii kuwii alam ka siinaayey,*
*Eexadiyo tuugada kuwaan kaba ajoonaynnin,*
*Anfacoodu nimaankuu ahaa dhiigga ubadkooda,*
*Abbaan kii u noqonaaya ee u andaqaadaaya,*
*Unuunkaba an goynnuu ahaa ol'oloheenniiye,*
*Wax la yiri ishaa aga duwaa inan sideediiye,*
*Sow ammuus iyo dhaygag iyo lama arkaan ma aha!!!.*

## HANTIWADAAGGA CILMIGA LAGU HABEEYEY
## 21-10-1972

Hantiwadaaggu waa mabda'a bini'aadmiga u ballan qaadaya nolool siman oo cadaaladi ku dheehan tahay. Hantiwadaaggu waa mabda'ay ka soo shaqeeyeen Maarkis, Engles iyo Leenin. Ma jiro ku labaad, mid saddexaad iyo mid afraad toona, sida dadka qaar sheegaan. Kuwa hantiwadaagga kala qaybiya dantoodu waxay tahay, inay jaha wareeriyaan ama shaki geliyaan dadka adduunka ku nool ee doonaya, inay gaaraan mabda'aas aayantiinka u leh. Tilmaamaha hantiwadaaggu way tiro badan yihiin; hase yeeshee, heestani waxay sheegaysaa waxyaabaha hantiwadaaggu doonayo iyo wuxuu diidayo qaar ka mid ah. Hantiwadaaggu waa mid socda oo u socda inay dadweynaha adduunka oo dhammi manaafacaadsadaan. Waa mid ka adkaaday kii ka soo horjeeday ee ahaa qawlaysatada hantigoosatada ah. Maxaan ku garan karraa sidaas. Waxaynnu ku garan karnaa in, hawl iyo hantiwadaaggu jirey 56 sano, ummadaha maanta ku dhaqamaana, waa addunka barkiis ama ka badanba. Halkaas waxaan ka ogaanaynnaa, inuu yahay cadceed soo baxaysa oo laba saac oo subaxnimo joogta; halka uu hantigoosadku ka yahay gabbal sii dumaya oo jooga laba iyo tobankii maqribnimo.

*Waa hilinkii nolol hagaagsan, oo habboon lagu helaayee,*
*Waa hilinkii harraadka iyo gaajada, lagu hilmaamayee,*
*Waa hilinkii kuwa dhiigga heensada, hanaqa goynayee,*

*Hantiwadaagga cilmiga lagu habeyey, waan u hiillinaynnaa,*
*Waan u hagar baxaynnaa, cadowga waan ka hor joogsanaynna.*

*Waa hilinkii sinnaan la wada helaayo, iyo hayey garsooriddee,*
*Waa hilinkii dadkoo shaqo u heeganoo, hal ah tilmaamayee,*
*Waa hilinkii nin hurda oo wax helaya, iyo hagarta diidayee,*
*Hantiwadaagga cilmiga lagu habeeyey, waan u hiillinaynnaa,*
*Waa u hagar baxaynnaa, cadowga waan ka hor joogsanaynnaa.*

*Waa hilinkii nafteenna oo aan hiishaniyo, kalsooni noo hayee,*
*Waa hilinkii inaynnu hal ahaanno, oon is hello doonayee,*
*Waa hilinkii gumaysiga wax heera, iyo harkiisa diidayee,*
*Hantiwadaagga cilmiga lagu habeeyey, waan u hiillinaynnaa,*
*Waan u hagar baxynnaa, cadowga waan ka hor joogsanaynnaa.*

## XANAY KU HAR XAASIDOW KU JAB — 1-10-1972

Intii aan xornnimada qaadannay doorashooyin ku *sheeg ayaa la samaynayey. Waxa ka soo qayb geli jirey* dad xoolo haysta keliya, qabiilna uu noqdo ruuxa la doorto. Haddaba kacaankeenna isagoo fulinaya ballamadii uu qaaday ee ku qorraa xaashidii kowaad oo ay ku yiilleen qodobbada aan ku soconno, ayaa waxa la sameeyey goleyaal u taliya gobollada iyo degmooyinka. Kuwaas waxa laga soo dhex saaray dadweynaha dhinac walbaba. Waxaana ka mid ahaa shaqaalaha, dhallinyarada, ciidamada qalabka sida, hooyooyinka iyo beeraleyda. Intaasoo dhammi waa intii la xaqiri jirey ee la oran jirey «Idinku waxba ma taqaannaan, siyaasiyiinna ma noqon kartaan». Haddaan ka soo qaadno shaqaalaha, waxay oran jireen maskaxdiinna ama aqoontiinnu waxay ku jirtaa muruqa,

dhallintana waxay ku oran jireen, «Idinku carruur baad tihiin oo siyaasad kuma fiicnidin». Askartana waxay ku dhihi jireen, «Askar yahay idinka waxaa laydiin sameeyey wax ilaalin iyo xuduudkoo aad joogtaan ee wax kale waxba kama taqaaniin». Hooyooyinka hadalkoodaba daa! Beeralayduna wax jira agtooda kama ahayn. Intaasi waa inta dalku ku dhisan yahay horumarkiisu. Jaalle Siyaad wuxuu yiri, «Annagu waxaan diidannahay in koox yari ay ku kor noolaato dadweynaha ama ay dhiigga ka nuugto shaqaalaha». 26dii Oktoobar mar uu la hadlayey shaqaalaha.

Intii xoogsanaysee,
horana loo xaqiri jiraye,
xaggoodi ka haystaan,
xalaashuun ku noolayd,
hadday maantay xukunkii,
xaney ku har xaasidow ku jab
waa xaqiiqa inaan xorownee.

Xamladii qabiilkiyo,
kumay xayrtu Weyntahay,
haddii xeerkaa laga tiray,
ayaa reer xiniinay,
ayaa xoolo badan qaba,
xaney ku har xaasidow ku jab
waa xaqiiqa inaan xorownee.

Xigmadii kacaankiyo,
haddaan xarafna laga tegin
loo taagay xididdada,
xeerkii Siyaad dhigay,
oo xukun shaqaale ah,
xaney ku har xaasidow ku jab
waa xaqiiqa inaan xorownee.

Afkeennii la xooree,
ee aan la xaalayn,
oo uu maanta xay yahay,
midka nacabku uu xaday,
haddii xuubka laga rogey
xaney ku har xaasidow ku jab
waa xaqiiqa inaan xorownee.

## FANNOOLE — 3-1-1972

Fannoole waa meel ku taal Jubbada Hoose, oo biyaxireen ah Jilib agteeda laga dhisi doono, faa'iido weynna dalkeenna u leh. Dhaqaalaheenna heer weyn ayuu gaar-

siin doonaa, mashruucaasi kolka ma aha, in laga aammuso ee waa inaan wax ka niraahnaa oon faallaynnaa. Waa wax loo baahan yahay, inaan la soconno dhulkeenna hadba waxa ku kordhaya. Tawraddeennu iyadoo waqti walba ku fakaraysa horumarinta dadka iyo dalkaba, haddana, Fannoole waa mashruuc gaar ah. Sabatu waxay tahay xagga beeraha ayuu innaga kaalmayn doonaa, beeraha iyo dabka warshaduhu ay ka soo baxaan - waxa bini'aadmigu ku nool ayaa ka dhalan doona. Caqliga faaya tawradda fiican fikradooda weeyaan Fannoole.

Waa fallaartii gumeystayaasha, feeraha kaga dhacaysee,
Fannoole, caqliga faaya tawradda fiicaan

Fikradooda weeyaan Faannoole!

Waa daawadii silicii fogaaday, lagaga faysanaayee,
Fannoole, caqliga faaya tawradda fiican

Fikradooda weeyaan Faannoole!

Xiriir ka fiican, ee aan furmaynnin,
kii sii falaayow,
Fannoole, caqliga faaya tawradda fiican,

Fikradooda weeyaan Faannoole!

Intii fahmeysee niyada fiican, kii ay ku faraxdow,
Fannoole, caqliga faaya tawradda fiican,

Fikradooda weeyaan Faannoole!

Filkaa kacaaya facooda dunida, kii feer dhigaayow,
Fannoole, caqliga faaya tawradda fiican,

Fikradooda weeyaan Faannoole!

## WAYNNU GUULEYSAN DOONNAA — 26-8-71

Shaki kuma jiro inaan guuleysan doonno oo aan ka guuleysan doonno dib ugaratada gaabiska ah, iyo gume-

ysiga kuwa ku daba gabban. Waxaa suurowda, inaan is wayddiinno ama la yiraahdaba oo sow maynnu guuleysan! Jawaabtu waa haa!. Laakiin dhab uma aynnu gaarin guul. Haddaan ku dhex jirnaa waddadii aynnu ku guuleysan lahayn. Haddaynnu niraahno: Wax waliba way hagaagsan yihiin, waxa dhacaysa, inaan is dhiganno oo markaas hawsheenniina hoos u dhacdo, gumeysigii iyo kuwuu ku shaqaysan jirayna ay ka faa'iidaystaan. Sidaa daraaddeed, waa inaan waqti walba, isku guubaabinnaa hawli inooma dhowa waxna maynnu qaban. Waxaan ka guuleysaneynnaa dib u guratada weli ka baqaysa, kii addoonsan jirey ee la eryey oo is leh armuu isticmaarkii soo noqdaa. Marka meel dambe, ayuu soo socdaa ujeeddadiisuna waa dhan walba raalli geli. Maahmaah baa tirrahda, «Hal laba geel jecel dhexdoodaa waraabe ku cunaa». Haddaba waxaan ka baqayaa in dhexyaalkaas labada dhan dhexdooda baabuur ku dilo.

Waynnu guulaysanaynnaa
Waynnu ka guulaysan doonnaa,
Gumeystayaasha iyo kuwii u gargaaraye.

Waynnu guulaysanaynnaa,
Waynnu ka guulaysanaynnaa,
Gaajo iyo cudur, iyo garasholi'i nagu gaamurtee.

Waynnu guulaysanaynnaa,
Waynnu guulaysan doonnaa,
Dib u guratadiyo kuwii na luggooynayee.

## HAWSHA MAANTU WAA HORUKACII BERRITO 13-6-1917

Cid muran ka qabtaa ma jirto adduunkoo dhan, in waxaad hore ugu dhibtooto keliya aad dheefsato hadhow. Waxa la yiri, «Saddex Eebbe waa awoodaa, mase yeelo, ilaahow guursan mayee, hay gablamin, Ilaahow xoogsan mayee, xoola i sii iyo Ilaahow camal falan mayee, hay cadaabin»!.

Maahmaahyo kalena waxay yiraahdaan; «Xaglo laaban Xoolo kuma yimaadaan». «Fadhi iyo fuud yicibeed laysku waa!» Waxaasoo dhammi, waxay ina tusayaan in

nimaan dhididini uusan heleyn dheel!. Dad aan aad u hawshooni, dalkoodu hore uma maro. Jaalle Siyaad wuxuu yiri, «dhulkeennu dhibaato wuu ka gudbi karaa, haddii aynnu si aad ah u shaqaynno. Haddii aynnu dad kale kaalmo ka sugnana, innagu marna noolaan maynno, isku kalsoonidu waxay inoo tahay hadaf iyo astaan»! Siyaad wuxuu hadalkaas yiri 13kii Oktoobar isagoo ummadda la hadlaya.

Haddaba innagoo ku hiranaynna taladaas kuna camal falanaynna iyada waa inaynnu shaqaalaha, beeraleyda. Hooyooyinka, Dhallinta iyo Ardada, xoolo dhaqatada iyo dadweynaha Soomaaliyeed oo dhammiba aynnu hawl badan oo horumarkii berrito ah ku dhaqaaqno. Heestani arrintaas ayay ku saabsan tahay.

Dalkeenna hooyo annagaa u heeggaan,
Annagaw hanuunsan horumarkiisa,
Hawsha maantu waa horukacii berrito,

Hawshoon ogaanno dadkoo is haysta,
Oo hal ahaadaa lagu hodmaa,
Hawsha .............

Dadkaa hayaamee hawada aaday,
Hagar la'aan bay ku hirgaleen,
Hawsha .............

Hal inaan ahaanno hadiyo jeerba,
Gumeysi hiifnaan u heeggannee,
Hawsha .............

## DHULKA DHULKA — 11-12-71

Qof kasta oo Soomaali ah dhulkaa leh! Waxaa isaga laga doonayaa, inuu ku welwelo oo ku seexdo kuna soo tooso dhulka maxaan u qabtaa iyo dadka maxaan u taraa! Heestani waxay saadinaysaa, innagoo wada garanna xilka inaga saaran dhismaha dalka, xilka inaga saaran midnimada iyo kan inaga saaran nabadgelyada. Madaxweynaheennu wuxuu yiri, «Ummadi waxay doonayso wa-

xay ku gaari kartaa, sidii hadba fikraddeedu ay noqoto. Marka waa inaan ku fikernaa sidee baynnu qaran cusub uga dhisnaa dalkeenna.». Sidaa wuxuu ku yiri mar uu la hadlayey kooxdii labaad ee ardayda ka soo baxday xarunta Xalane 18 Febraayo 73.

Waa run in dhismuhu ku xiran yahay fekerka qofka. Waxaad bal ka soo qaaddaa aabbe wanaagsan oo ka fekera carruurtiisa iyo gurigiisa, oo wax bara kuna hanuuniya asluub wanaagsan. Haddaba maxay noqonayaan ilmahaasi hadhow? Waxay noqon karaan kuwo naftoodana anfaca aabbihii soo koriyey iyo hooyadana wax tara, dadkooda iyo dalkoodana wax u gala.

*Dhiigga inaan u sayrinno, dhulka dhulka*
*Nafta inaan u dhibno, dhulka, dhulka*
*Cadowga ka dhowrraan ku dharsannee,*
*Ceebta inaan ka dhowrnoo, dhulka, dhulka*
*Dhibta inaan u diidnoo, dhulka dhulka*
*Dhaqso u dhisnaabaan ku dhaarsannee,*
*Dhididka inaan u sayrinno, dhulka, dhulka,*
*Muruqa inaan u dhiibnoo, dhulka, dhulka,*
*Dhidibka u aasnaan ku dhaarsannee,*
*Gaajo inay dhammaato, dhulka, dhulka,*
*Cudurka inaan ka dhowrro, dhulka, dhulka,*
*Dhammi la sinnaadaan ku dhaarsannee,*
*Dhulku inuu midoobo dhammi dhammi dhashu,*
*inay is raacdo dhammi dhammi nabad ku dhisnaannan*
*ku dhaarsannee.*

## CAYNAANKA HAY — 20-1-1971

Kacaankeenni 21kii Oktoobar, markuu dhashay, waynnu ku wada faraxnay, dibusocodka mooyee. Hase yeeshee, in kastoo warqaddii caddayd ee uu soo saaray kacaanku ay ahayd mid caddaynaysay ujeeddada dheer ee kacaanka, haddana waxaa lays lahaa bal aan eegno. Maxaa wacay, wax badan bay arkeen dadweynuhu ballan la qaado oo laga baxo! Hase ahaate, markii durba shisheeyihii laga qaaday warshadahii iyo bankiyadii dhaqaalaha dalka gafanaha ku ahaa ee dhuuqayey, ayaa intii siyaa-

dadda horusocodka ah ku socotay taageero buuxda siisay go'aankaas. Haddaba hooballadu waxay wax ka tiriyaan waxa dadku ku sheekaysto, ama ku hadlayo. Markaan isu fiiriyey wixii dadweynaheennu ku fikerayey iyo wixii aan soo marnay ayaan goostay inaanan waxba kaydsan, oon ka baxo wararka dib uguratadu ku tiraahdo dadka ee ah aasha soco adduunku wuxuu noqon doono lama ogee oo cidna eed ha ka gelin. Sidaas ayaan heestaan ku allifay.

Waddadii caddayd cagta saartayee ku carraabiyoo
Cimrigii jiryow, jiryow, jiryow caynaanka hay,

hay, hay, weligaa hay.

Caqli toosanoo caafimaad qabaad nagu caymisee,
Cimrigii jiryow, jiryow caynaanka hay,

hay, hay, weligaa hay.

Cududdoo midiyo caanaha wadaag waa caaddilnimee,
Cimrigii jiryow, jiryow, jiryow caynaanka hay,

hay, hay, weligaa hay.

Kii ciil qabee cunto gooni rabey ciidda ha galee,
Cimrigii jiryow, jiryow, jiryow caynaanka hay,

hay, hay, weligaa hay.

Cadawgeenna badan aan caddadinnoo cagta hoos dhignee,
Cimrigii jiryow, jiryow, jiryow caynaanka hay,

hay, hay, weligaa hay.

## CODKA MACALLINKA — 20-8-1971

Macallin waa maxay? Maxaa isweydiinta keenay? Waxaa keenay dad badan baan aqoon qiimaha macallinku uu leeyahay, ama dadweynaha ha ahaadee ama macallimiinta naftooda ha aahadeene.

Iyadoon la wada dhammayn karin tilmaamaha macallinka, ayaan isku dayey, inaan heestaan wax kaga sheego wuxuu yahay.

Macallinka waa waalidkaaga labaad, waa kii waxa wanaagsanna kuu sheega, waxa xunna kaa celiya; hadduu xilkas yahay isagu. Waa kan cilmiga kuu bilaaba, adoon waxba aqoon, waa kan ku gaarsiiya inaad wax akhriso waxna qorto; kuwaasoo la'aantood ay qofka wax ka dhimman yihiin dadnimadiisa. Haddaba waxaa waajib ku ah macallinka; inuu u qalmo waalidnimadaas maxaa yeelay, ubadka wanaagsani wuxuu ka yimaadaa waalid wanaagsan.

Ubadka waxaa looga baahan yahay, inay u gartaan waalidkooda run ahi, inuu uga baahan yahay xushmad, xaqdhowr iyo sharaf.

Waxaynnu xusuusan nahay heesta shaafida ah oo dugsiga Quraanka. «Macallinkeen Allow kaal, Macallinkiis Allow kaal, in kaashaba allow kaal».

Aabbihii dadkaan ahay, abuurihii tacliintiyo,
Ubadka soo kacaan ahay, waa inaan guntiga,
isku adkeeyaa, waa inaan ummaddayda,

aan iftiinka u hor qaadaa.
waa inaan ummaddayda

Indhihii dalkaan ahay, aqoonta kii u yeeshaye,
dadkiisu eegayaan ahay, waa inaan guntiga,
isku adkeeyaa,
aan iftiinka u hor qaadaa.
waa inaan ummaddayda

Aabbihii dadkaan ahay, aayaha dambeetiyo,
abuurka beerayaan ahay, waa inaan guntiga,
isku adkeeyaa,

aan iftiinka u hor qaadaa.

Wanaagga kii arkaan ahay, albaabka kii furaayee,
taariikh unkaayey baan
ahay, waa inaan guntiga
isku adkeeyaa, waa inaan ummaddayda,

aan iftiinka u hor qaadaa.

## URURKA CAAFIMAADKA — 25-4-1971

Caafimaadku waa maxay? Qof aan caafimaad qabini dal iyo dad midma waxba uma taro. Haddaba si aan u geesinnimo gelinno Jaallayaasheenna caafimaadka inooga shaqeeya, ayaan u tiriyey heestan. Markii cudurkii xumaa ina soo maray (daacuunkii) ee dhakhtarradii muujiyeen karti iyo waddaninnimo aan xad lahayn! Inta caafimaadka ka shaqaysa maxay u qabtaan ummadda? Run ahaan, wax weyn bay u sameeyaan. Bal aan ka soo qaadno, marka ay hooyooyinkeen, walaaleheen iyo xaasaskeennu ku umulayaan waxay u qabtaan! Qof buka oon kici karin markay kaadida iyo candhuufta ka qaadaan, ee ay saxarada ka asturaan. Markay ruux jirran ama mid qaaxo qaba ay ka shaqaynayaan oo ay cudurkana ku dhex jiraan, marka meesha cudurrada lagu baaro aad geyso kaadi, ama saxaro, ay faraha kula jiraan iwm. Waxay innaga mudan yihiin ammaan iyo mahadnaq, inkastoo ay taasi shaqadoodii tahay oo hawlihii dalka, halkaas ay kaga hagaageen. Haddana wax bay ina dheer yihiin. Dad naf bini'aadmi ilaalinayaa iskuna deyeya, inay badbaadiyaan oo ay ka nabadgeliyaan halista kaga imaanaysa cudurrada. Jaalle Siyaad mar uu la hadlayey iyaga wuxuu yiri, «Iyaga waxaa ku waajib ah, inay gartaan hawsha ay hayaan qiimaha ay leedahay, dadka ay daaweynayan, inay walaalahood yihiin u baahan, iyo in bini'aadminnimada ay ka mid tahay qof tabar daran in la kaalmeeyo.......... ».

Ururka caafimadka,
dadka u ciidmayaasha,
cudur la dirirayaashaa,
oo carradeenna ha la ciseeyo

oo carradeenna ha la ciseeyo.

Ururka caafimaadka,
aan caajisaynnin,
hurda ka caaganaaday habeen,
dadkooda caawimaaya,

oo carradeenna ha la ciseeyo.

Ururka caafimmaadka,
dadku u wada cawdaane,
carruur iyo cirroole,
midna aan cayrinaynnin,

oo carradeenna ha la ciseeyo.

Ururka caafimaadk,
intaa carrada maraayee,
cunto aan doonanayne,
cabsida naga ilaasha,

oo carradeenna ha la ciseeyo.

## MA DOONAYAAN — 31-1-1871

Waa dhab inuusan rabin keligii cuno in la wada noolaado kuwo badan oo oogada inooga eg afkeenna ku hadlayana ayaa diiddan, inaan dawlad ahaanno! Waxaa run ah, inaan xornimada si loo wada aqoon. Dad waxay u yaqaannaan gobannimada calan la taago kuwana waxay u yaqaanniin, xafiisyo, baabuurro cadcad oo la fuulfulo iwm. Dad kalena waxay u qabaan xornimadu inay tahay, madax bannaanida xagga siyaasadda iyo xagga dhaqaalahaba, caddaladda oo loo sinaado, xagga nolosha ummadda iyo sharaf dalkaaga iyo dadkaaguba ku leeyahay dunida korkeeda oo la tixgeliyo iwm. Laba weji oo aan sheegay midba mabda' baa u aabba ah. Kan hore, waa hantigoosad oo keligii cunuhu ma oggola sinnaanta dadka. Maxa yeelay, danahiisii ayaa wax ka lumayaan. Si aan wax uga hallaabin, waa inuu xornimada qaar ka tago oo la heshiiyo gumeysiga, dadkiisana ka soo hor jeesto. Waa kuwa aan doonayn, inaannu dawlad ahaanno. Kan labaad waa dhaqanka hantiwadaagga cilmiga ku dhisan (Maarkisiisim-Leniniisim). Midkaasi waa midka keliya ee xaqiijinaya, in ummaddu ay dhan walba ka xorowdo, xagga siyaasadda, dhaqaalaha iyo maskaxdaba.

*Ma doonayaan inaynnu dawlad ahaanno!*

*Ayaan doonaynin?*

*Kuwii dhiiggeenna durduuran jirey,*
*Kuwii danahooda samaysan jirey,*
*Kuwii Soomaali dullaysan jirey,*

*Kuwii qabiilka ku doodi jirey,*
*Kuwii danaheenna xabaali jirey,*
*Kuwii gumeysigu diran ogaa,*
*Kuwii ubadkoodu inkaari jirey,*
*Kuwii ardaydooda ka oohin jirey,*

*Aynnu dillo aynnu dagaallee*
*ka digtoonaada dadka dadkayagow.*

## G A B A Y

BAADIDA — 1-5-1971

Dadka waxaa ku dhex jira qof munaafaq ah oo afkana kaala jira uurkana allow sahal ah. Sidaad wax u doonayso si aan ahayn ayuu munaafaqu wax kuula doona. Gabayaa badan oo Soomaaliyeed ayaa wax badan ka hadlay arrintaas.

Munaafaqnimada gabayada ku saabsan waxaa ka mid ah:

*«Qosol beena fool wada qayaxan qiil aan garanaayo,*
*Booraan afkii laga qafilay qabarna hooseeyo,*
*Doqon baa halkii lagu qatali qoorta soo dhigane,*
*Ma anaa mindiyo lay qarshaa laygu qali doono».*

(Waxa tiriyey Faarax Nuur)

Gabayagaasi wuxuu ina tusayaa, in ragguu Faarax Nuur moodayey saaxiibbo ay munaafaqnimo kula dhaqmeen. Kuwaas waa kuwa la yiraahdo kula jire kaa jire. Wax badan buu Jaalle Siyaad ka hadlay kuwaas oo kale. Wuxuuna ogyahay, inay jireen, haddana jiri doonaan haddaan loo dabar goyn si dhaqso ah. Meel walba way isku qariyaan sida rahu dhoobada isugu qariyo.

*Maahmaah dadkii hore siday diirka ka caddaysay,*
*Baadida nin baa kula deydeyi daalla kaa badine,*
*Dadkuna moodi duul wada dhashoon wax u dahsoonayne,*
*Oon doonahayn inaad heshana daa'in abidkaaye,*

*Maantana dad caynkaas ahoo duuban baa jira e,*
*Oo qiiq iyo dabayl soo huwada oo dadaal badane,*
*Raadkiina dib u raacayoo diiddan geeddiga e,*
*Degelkaan ka soo gurayey dooxatadu tiillay,*
*Gurigii dugaaggiyo lahaa dabato caydheeda,*
*Niman darajo waaweyn lahoo doonaya jira e,*
*Qabiilkaynnu duugnee shacbigu hees ka daba qaabay,*
*Karfantii dad kala soo baxoo shalay ku dooyeystay,*
*Ayaa subaxdii daayaa yidhaa oo durbaan tuma e,*
*Dallo ma laha aakhiro haddii loo kitaab dayaye,*
*Inta ay dagaal dhow yihiin aynnu dabar goynno,*
*Haddii hale waxay damac yihiin duugga bal aan eegno.*

## KOL HADDAAN HANTIYEY — 30-5-1970

Kol haddaadan xor ka ahayn dhaqaalaha waxaad tahay ma jire, waxna ma qaban kartid. Kacaankeenna guuleysani, isagoo middaa maanka ku haya, waa kii inoo soo wareejiyey halbowleyaashii dhaqaalaha.

Dhaqaalaha xoreyntiisu macnihiisu waa inaad; xagga siyaasadda xor ka ahaataa oo aadan deeq dad kale ku xirnayn. Taasi waxay ku fadhidaa mabda'a hantiwadaagga cilmiga ku dhisan. Mabdu'u dadweynaha dantiisa ayuu dhowraa. Madaxweynaheenna ha jiree, 21 Nofeembar 1970, qolada dawooyinka isagoo la hadlayey, wuxuu ku yiri, «Haddii mar qarankeennu doortay waddada hantiwadaagga, annagu waxaan ku shaqayn doonnaa isku kalsooni, mana u oggolaan doonno sina, in waxtarka dhulkeennu leeyahay galo gacan shisheeye, sidii dhici jirtay waayadii hore». Halkaas waxaan ka garan karraa, in tawradeennu warmaha iyo gaashaanka u qaadatay, inay soo celiso maal, magac iyo maamuusba waxay Soomaalidu lahayd innagoon cidna u magansan.

*Kol haddaan hantiyey hawshii dalkee nacab haysan jirey,*
*Oon horuumaroo baryadoon ka haro bilinkeedi maray,*
*Hiil iyo haddaan hoo leeyohoo, aanan habranayn!*

*Kol haddii hurdadii aan ka toosayoo, aan hidiyey socod,*
*Oo aan holladay, inaan hagar la'aan hiigsado facay,*
*Hiil iyo haddaan hoo leehoyoo anan habranayn!*

*Kol haddaan sharcigii la hagoogi jirey heeryada ka rogay*
*Oo ay dadkii ku hungoobi jirey hal u wada yihiin,*
*Hiil iyo haddaan hoo leehoyoo anan habranayn!*

*Kol haddaan hantiyey hawshii dadkoo nacab haysan jirey*
*Oon horor dambiyo halaqa iyo abees hoos ii dhigayn,*
*Hiil iyo haddaan hoo leeyhoo anan habranayn!*

*Kol haddaan hantiyey hawshii dalkee nacab haysan jirey,*
*Oo aan wixii hore layga dhacay soo hooyey shalay,*
*Hiil iyo haddaan hoo leeyohoo anan habranayn!*

## WAA INAYNNU — 20-7-1970

Min madaxda waaweyn ee hantiwadaagga ka mid ah ayaa ka sheekeeyey faa'iidada ay leedahay talada dadweynaha laga qaato kaddibna lagu celiyo, iyadoo hufan. Maalin dambe waxaad maqli doontaa iyadoo la leeyahay. «Alla ma uurkayagaa lagala baxay»! Anigoo aamminsan kuna kalsoon, inay madaxdeennu tahay mid dadka la tashata oo ka shaqaysa danaha ummadda, ayaan taladaydii ku dhiibtay heeskan. Talada dadkaa leh, kacaanka dadkaa leh, madaxduna intaas ayay ka mid tahay. Way dhammaatay fikraddii kala saaraysay dawladda iyo dadweynaha, waxa iyana dhammaanaysa fikraddii ahayd, «Ma anaad wax ii sheegeysaa iyo isla weynidii qurunka ahayd». Waxa la yiri, «ruuxna korkiisa biyo kama hagrado», Talada arrinta iyo isu sheegidda yaynnaan la gabban oo is dhihin lagaa maqli maayo, sida afmiinshaarradu u maleeyaan. Ra'yigaad hagrato naftaada, carruurtaada, dalkaaga iyo dadkaaga ayuun baad ka hagratay ee ogow. Mabda'a hantiwadaagga ahi wuxuu ku dhisan yahay wada tashi. Nofeember shantedii, mar uu Jaalle Siyaad la hadlayey maamulayaasha guud, wuxuu u sheegay in xilka waddanku dusha uusan ka saarrayn Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha keliya, ee uu ka saaran yahay ruux kasta oo Soomaali ah. Waxaa looga baahan yahay, inuu qofku door weyn ka cayaaro dhismaha siyaasadda iyo dhaqaalaha dalka. Hadalkaasi wuxuu daawo u yahay kan weli u sii buka, wuxuu keligiis qarsado, sidii tuugo oo kale, iyo kuwa weli qaba, in dawladda iyo dadweynuhu ay kala gaar yihiin siddi layna baray.

*Waa inaynnu cadawga nolosha nacnaa,*
*Waa inaynnu nacabka waddanka nacnaa,*
*Waa inaynnu cadawga nabadda nacnaa,*

*Nolaatayey niyadii shacbigu noolaatayey*
*Naafoobayey naar quutayaal iyo nacab kalkaal*
*Naafoobayey.*

*Waa inaynnu camalladeenna u caad baxnaa,*
*Waa inaynnu cududaheenna ku ciil baxnaa,*
*Waa inaynnu caqliga dadkenna cullaa,*
*Nolaatayey niyadii shacbigu noolaatayey*
............

*Waa inaynnu cilmiga afkeenna cisnaa,*
*Waa inaynnu carrabka codkeenna qorra,*
*Waa inaynnu dunida ka caan noqonnaa,*

*Nolaatayey niyadii shacbigu nolaatayey*
............

*Waa inaynnu calanka u ciidaminnaa,*
*Waa inaynnu cadawga ka caymadinnaa,*
*Waa inaynnu cadkiisa u soo celinnaa,*
*Nolaatayey niyadii shacbigu nolaatayey*
............

## CILMI BARTA — 1968

Cilmigu waa hubka u weyn ee lagula dagaallamo, gaajada gumeysiga iyo kuwa u adeega isaga iyo xummaan oo dhanba! Haddaba dadka doonaya, inay intaas ka xoroobaan, waa ku waajib inay cilmi bartaan. «Waxbarashadu waa iftiinka u weyn ee wax lagu arko, aqoon la'aanina waa iftiin la'aan, waa aqal iyo ilays la'aan oo waa omos iyo biyo la'aan» waxaa yiri erayadaas fannaankii weynaa Cabdullahi Qarshe. Nasiib wanaag waxaa inoo ah inaan immika wax ku baranaynno afkeenna oo inoo fududaynaya dhabbaha cilmiga, si dhaqsa ahna inooga saaraya mugdiga aqoon la'aanta. Gacan cadaw waannu ka baxnay, af shisheeyana waan ka xorownay. Sidaas daraaddeed waa inaan dhammaynnaa ayaandarrida hadda

ka hor dadkeenna haysatey, ee ahayd inaannu boqolkiiba sagaashan aynnaan waxba qorin waxna akhrisan. Jaalle Siyaad wuxuu yiri, «Muddo yar in boqolkiiba boqol wax qorto waxna akhriso, dagaal weyn bay u baahan tahay. Waxa ina sugayaa waa cadaw gudaha guryaha inoogu jira, una baahan inaan xoog ku muquuninno. Waynnu karnaa maanta, hubna waynnu u haysannaa oo waa afkeenniyo farteenna!...... ».

Aynnu cadawgeenna caabbinee cilmi bartay,
Aynnu carradeenna cayminnee, cilmi bartay,
Aynnu cududdeenna ciirsanne, cilmi bartay,
Aynnu gumeysiga cirib tirree, cilmi bartay,
Aynnu cagaheen ku soconnee, cilmi bartay,
Aynnu carrabkeen ku hadallee, cilmi bartay,
Aynnu camalkeen hagaajinnee, cilmi bartay,
Aan caafimaadno, cudur tirnee, cilmi bartay,
Aynnu carraadeenna beerannee, cilmi bartay,
Aynnu cuntadeen sameeysannee, cilmi bartay,

## DHALLINTOY DHAMMIDEEN — 1968

Maxaa hadiyo jeer loo yiraahda dhallinta adduunkoo dhan? Maxaa loo waayey ummad ka aamusta oo iska deysa dhallinyarada? Sababtu waxay tahay dalna ma jireen dhallinyaro la'aanteed. Hadduu jiri lahaana dadkaasoo kale hore uma mareen. Dhallintu waa xoogga cusub, maskaxda cusub, waxayna kolley noqon doonaan hoggaamiyayaasha berrito. Sidaa awgeed, dalkasta, markuu la kulmo dhib, wuxuu ciidansado oo uu u yeerto ayay ugu horraysaa dhallintu. Dhallinteennu wa qayb ka mid ah dhallinta adduunweynaha; laakiin, waxaa xooggooda, maskaxdooda iyo waxtarkoodu ay ku xiran yihiin hadba, siday u fekeraan, inay yihiin kuwo u jeeda danaha dadka, dalka iyo inay yihiin kuwo ka sooo hor jeeda arrimahaas.

Waa jira qof dhallinyar oo ay hawlihiisu waxyeello geystaan markuu ku fakaro maskax hantigoosad ah amaba markuu ku fakaro dhaqan shisheeye oo uu kiisii la xumaado. Qofka dhallinta yari hadduu noqdo caajis oo uu

maskaxda ka curyaansamo, sow danta dalka kama hor jeedo? Waxaynnu rajaynaynnaa, inay dhallinyarada Soomaaliyeed xilka ka saaran waddankooda ay gartaan.

Dhalintay dhammaanteen dheddig iyo laboodba,
Gacmahaysu dhiiboo, dhib iyo xummaanta,
Ma ka dhiidhiyeynnaa,

Dhulku waa dhulkaygii anna waan u dhaartay,
imaan dhiig u daadshoo, dhibtiyo xumaan,

waan ka dhowraynnaa.

Dhaqdiidka baarkiyo, dhismaha qabiilkiyo,
Dhulkeennaa la haysto, dhallinyaray bal eegoo,

maysu dhow yihiin.

Nin dhergoo dillaaciyo, dibjirkaa dhammaaday,
magac baw dhexeyee, dhallinyahay bal eegoo,

ma u dhow yihiin.

Dhaydiyo garoorkii, caanihii dhulkeenna,
in yar baa dhamaysoo, keligood dhergaayee,

ma ka dhiidhiiyeynnaa.

## XAARAAN QUUTAYAASHII — 21-10-1969

Xaaraan quute waa booli cune. Xaaraan quute waa ruuxii wuxuusan lahayn cuna! Waa qofka masaakiin waxeed ama agoon waxeed cuna! Haddaba way ku sifowday tiimaantaas aynnu sheegeynay? Yaa cunay maatada wexeedii? Yaa boobay ummadda maalkeedii? Waxa boobay «Qawleysatadii» la burburiyey 21kii Oktoobar, iyo hantigoosatadii dhiig cabka ahayd ee qayrkeen inaga reebtay. Kuwaasi waa kuwo hanan waaayey gobonnimadii dadku dhalryey ee u loogay shisheeyaha. Waa kuwii Soomaali qaybiyey iskuna wada diray, si ay iyagu u nabadgalaan una raaxaystaan inta laysku sii jeedo! Xumaanta inaga

bixi la' ee ah eexda, laaluushka, qaraabakiilka, tuugada iyo jaajuusnimadu waxa weeye, waxay inagu beereen.

Taariikhdu ninna ma doonto, ninna ma diiddo oo runtay dacalka ku haysaa! Dadow, dadow, ogow arrintaas.

Qof waliba wuxuu ku dhigto taariikhda ayuu ku leeahay ha dhoowaato hase dheeraatee!.

Xaaraan quutayaashii, xaqiraayey shacabkee,
Xaqiisii maroorsaday, kuwii naga xoreeyow,

Xamdi baan idiin naqaynnaa.

Xasadkiyo qabiilkiyo, raggii xukunka baas wadey
Ee Soomaali kala xiray, haddaad naga xoreyseen,

Xamdi baan idiin naqaynnaa.

Kuwii aan xishoodkiyo, garanayn xuquuqdee,
Xaabsaday wexeennii, haddaad naga xoreyseen,

Xamdi baan idiin naqaynnaa.

## ALLAAHU AKBAR — 13-6-1969

Heestani waxay ku saabsanayd una dambayesey dabbaaldag ay ka soo qayb galeen madaxdi musuqmaasuqa 1° Luuliyo 1969. Waxaan is iri, bal xusuusi gobannimada, sidii lagu helay iyo waxyaalihi inoo dhignaa ee ku yiil sharciyadii xisbiga S. Y. L.; dadkuna ku dagaallamayey.

Waxyaalahaas waxaa ka mid ahaa wadajir, sinnaan, Soomaali oo laysu geeyo, afkeennoo la qoro; iyo gumeysiga oon la dirirro weligeen. Waxasoo dhammi waxay noqdeen in lala yaabo qofkii waxaas hadal haya, amaba ka sheekeeya. Waxyaalahaas wanwanaagsan qofkii ka hadla waxa loo yaqiin mid aan dantiisa ogayn oo lagu yiraahdo «war nacasyohow shaqayso! Ma wixii laga baxay baad waddaa!» Kaasi markuu noqday nacas fariidku kee

buu ahaa? Qabiiliga, tuugga ummadda waxeeda xada, kan eexashada ku shaqeeya, kan jaajuuska ah ee sirta iibsada, kan daaraha badan ku dhista tuugo. Hal haysku wuxuu ahaan jiray, hebel intuu xafiiska fadhiyey aad buu uga xoogsaday, daaro badan ayuu ka dhistay, beero ayuu ka samaystay, dad badan oo tolkiisa ahna shaqo ayuu ka siiyey. Ninkaasi waa nin rag ah oo ammaan ayuu mudan yahay. Waan wada ogeyn arrintaas. Maahmaah baa tiraahda, «Laab meel dhacday lama loodiyo». Hadal inuu wax ka taro laab maamul xumo dhacday rajo lagama qabin. Hase yeeshee, waxaa jirtey mid kaloo tiraahda, «Madax muuqda iyo mindi saawir ah midna lagama quusto!.

Markaan gacanta dhaabnaa Soomaalidu dhawaaqdee,
Markii saf loo dhaqaaqaa dhintuu gumeysi dhuuntee,
Haddaan dhagaxa loo ridin calanka maynnu dhidibneen
Haddaan geesiyaal dhiman xornimo kuma dhawaaqneen,

Haddaan dhimasho loo hurin Jamhuuriyad ma dhalinneen,

Dhaxal xumaa dhaxal xumaa kuwaan aqoon dhibkooda,
Dhaxal xumaa dhaxal xumaa kuwaan qabiilka dhaafin,
Dhaxal xumaa dhaxal xumaa kuwaan muruqa dhuuxin,

Inaan qabiilka dhaafnoo dheregna aynnu gaarno,
cudurkana dhammaynnoo ayaa inoo dhignaydee,
Shanta in lays dhex keenoo dhashoodu wada cayaarto,
gumeysiga ka dhawrno adduunkanaw dhaxaynno,
ayaa inoo dhignaydee

Haddaan murtida la dhuuxin oo aan la dhigin afkeenna,
Oo aan shisheeye dhowrro dhanna u ciirsan maynnee,
Haddii dhereg la doono oo aan dhib loo adkaysan,
Oo aynnu meel dhacdiidno dhanna u ciirsan maynnee,
Haddaan dhaqan wareegnoo oo aan dharkeenna xoorro,
Oo ay dhashii illowdo dhanna u ciirsan maynnee,

Dhaxal xumaa dhaxal xumaa kuwaan aqoon dhibkooda,
Dhaxal xumaa dhaxal xumaa kuwaan qabiilka dhaafin,
Dhaxal xumaa dhaxal xumaa kuwaan muruqa dhuuxin.

Dhallin yahay dhammaanteen xumaha mayska dhaafnaa,
Dhallin yahay dhammaanteen samaha maw shaqaaqnaa,
Dhallin yahay dhammaanteen dhulka maw shaqaynnaa,
Dhallin yahay dhammaanteen cududda maysu dhiibnaa,
Dhallin yahay dhammaanteen dheg xumada ma diidnaa,
Dhallin yahay dhammaanteen dhiiggeen maw ekaannaa,

Waxaan wadajir loo dhalin ninna ku dhaadan maayee,
waxaan dhididka loo shubin ninna kuma dhergaayee,
waaxan garasho loo dhigin, dhaliil lagama waayee,
waxaan dhiirri loo qaban hadal kuma dhammaadee,
waxaan seeska loo dhigin dhaxal lagama gaaree.

## ISTICMAARKU DHULKEENNII — 1-9-1964

Haddaan nahay Afrika, isticmaarku waligeen in yar oo wanaag ah inooma samayn; laakiin wuxuu inagu sameeyey baa badan oo waxyeello ah. Markaasuu ku dadaalay, inuu ina illowsiiyo xumihiisii oo uu inaga sii jeediyo, isagoo kaalmaysanaya kuwo hanyar oo ku kooban dantooda keliya. Gumeysiga dantiisuna waxay ahayd, in kuwaas iyo dadku isku sii jeedaan oo uu talada ula wareego.

Gumeysigu sidaas ayuu u noqday dhex ku bari markii uu xoogga isku jebiyey. Taasi waxay ka tahay tabaha gumeysiga, intii muddo ahna way u meel martay, wayse soo dhammaanaysey. Sidii eyda gumeysiga iyo dhiigyacabka hantigoosadka ku qaraabta loo eryi lahaa, waxay si taa

lagu gaaro u baahan tahay, in dabku wax badan soo shidmaa guubaabadu badataa, oo yaa maali jirey ay ka dhacdaa. Innagu haddaynnu Soomaali nahay, waan soo marray waxaasoo dhan oo heestanaaba ka mid ah. Wuxuu dagaalkeennii dhalay kacaankii 21kii Oktoobar 1969.

Isticmaarku dhulkeennii, waa kaa dhumiyee,
Wax damboon dhawrnaa, dhaxal nooma lehee,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Dawladeenna dheg weyn, barkin dheer dhigatee,
nin qabiil dhisayana, cadaw kaama dhacshee,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Calankaad dhidibteen, ee dhibka aad u marteen,
in yar baa dhaxashoo, keligood ka dhergee,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Dhallaankeenniii waa kaa, gaajo dhaaxa qadee,
shisheeyii dhergayee, dadna dhawranayee,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Soomaalay dhegalay, dhaxalkeed ma cuntay,
qabiilkay ku dhinteen, dhabarkuun ku sidaay,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Soomaalay indhalay cadawgeed ma dhugatay,
isticmaarka dhashiis, walaalkeed ka dhigtay,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

lagu gaaro u baahan tahay, in dabku wax badan soo shidmaa guubaabadu badataa, oo yaa maali jirey ay ka dhacdaa. Innagu haddaynnu Soomaali nahay, waan soo marray waxaasoo dhan oo heestanaaba ka mid ah. Wuxuu dagaalkeennii dhalay kacaankii 21kii Oktoobar 1969.

Isticmaarku dhulkeennii, waa kaa dhumiyee,
Wax damboon dhawrnaa, dhaxal nooma lehee,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Dawladeenna dheg weyn, barkin dheer dhigatee,
nin qabiil dhisayana, cadaw kaama dhacshee,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Calankaad dhidibteen, ee dhibka aad u marteen,
in yar baa dhaxashoo, keligood ka dhergee,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Dhallaankeenniii waa kaa, gaajo dhaaxa qadee,
shisheeyii dhergayee, dadna dhawranayee,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Soomaalay dhegalay, dhaxalkeed ma cuntay,
qabiilkay ku dhinteen, dhabarkuun ku sidaay,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

Soomaalay indhalay cadawgeed ma dhugatay,
isticmaarka dhashiis, walaalkeed ka dhigtay,
dhammaanteen kaca,

oo u dhaarta oo dhabeeya eey.

## GEEDDIGA WADAAY — 1962

Jaallayaal intaynnaan heestaan akhriyin wax yar aan ka sheekaynno waxay ku timid. Sidaynnu ognahay, xornnimadu waa qaali, markii la doonayana, dad baa u dhinta, qaar baa loo xiraa, kuwana wayba ku cirroobaan.

Sababtu waxa weeye, in xornnimada lagaga baxo silicii gumeysigu na baday, ee ahaa cudurka, gaajada, jahliga, caddaalad xumada, iyo kala qaybinta. Xornimadu ma aha calan la taago oo lagu hoos bakhtiyo mana aha magacyo lala baxo Wasiir, dibutaati, Madaxweyne iyo iwm.

Markii aynnu eriney gumeystayaalkii, oo innagoo isku mid ah, aynuu u dhiibannay maamulka talada ee madaxdeennii aan ka sugaynney barwaaqada gobannimada inay ina gaarsiiyaan; waa tay waddada ka leexdeen ee ay burburiyeen himaladii ummada iyo wadajirkeedii oo ay noqdeen dhuuni raacyo; dadkii soo halgamayna waa tay kharribeen qaar qaarna waa tay garteen, in hawsha halkeedii laga wado, dagaalkii gobannimadoonka ahaa ee horena in la soo celiyo lagana soo hor jeesto gumeysiga cusub iyo dabadhilifyada uu dalkeenna ku abuurtayba.

Marka heestani waxay ku saabsan tahay arrintaas iyo sidii halgan cusub loo wadi lahaa.

Nin gumeysi raacay isagow go'aayee,
gobannimo nin doonay guulbow dambaysee,

Guulaystayaal geeddiga wadaay!

Dadkii nala gudboonaa dayaxuu u guuraye,
Nin qabiil gargaarsaday meelna gaarimaayee,

Guulaystayaal geeddiga wadaay!

Gurgurka iyo heeryada guud weyne saaroo,
raskii aan gaarree guduntana afeeyoo,

Guulaystayaal geeddiga wadaay!

Iyadoo gu'gii da'ay gabannada aad leedahay,
Oon laguma goo'yiyo jiilaal gawaanee,

Guulaystayaal geeddiga wadaay!

Isticmaar gaboobiyo midka haatan soo galay,
Wixii nala gudboonaa uga gaabsan maynnee,

Guulaystayaal geeddiga wadaay!

## SOO DHAQAAQA — 10-8-1965

Dhulka waa in la daafacaa oo laga dhowraa cadawga dibedda iyo kan gudahaba. Waa in barbaartu hanato oo ay ahaato tan aad u daafacaysa, maxaa yeelay, iyagu dalka way uga dhow yihiin dadka kale, waana kuwii waddanka u harayay, marka waayeelku ka tago. Kolkii heestani soo baxday, waxaa aad loogu baahnaa dhallinyarada Waxay ahayd, markii dibedda laynaga soo weeraray. gudahana gumeysiga cusubi qabsaday. Shalay la soo dhaaf, maantana waa la joogaa. Dhallinyaradu waxay leedahay aqoontii ay ku daafici lahaayeen dalka xagga siyaasadda iyo xagga dhaqaalahaba. Haddaba aannu ilaalinno dalkeenna, dadkeenna, iyo tawraddeennaba. «Barbarkay ka baxdaa waa bakayle qaleen, dhallinyaray bi'i waaya barbarkiinna ilaasha!». Taariikhdu yay idin ceebayn maxaa yeelay idinku ma ahidin kuwii caajisi lahaa bal xusuusta dib u dhaca dalkeenna yaalla. Bal xusuusta gaajada, cudurka, aqoondarrida gumeysigii inagaga tegey. Bal xasuusta Soomaali shan ah immisaa maqan? Aah!.... Aah!.... Aah!.... Aah!... Aah!....; wax la yiri, «Is moog dhuubay asleysaa!».

Dhallin yahay dhammaanteen, dhimashadu xaq weeyoo,
kana dhowrsan maynnee, dhulka aynnu daafacnee,

Soo dhaqaaqaay!

Ciidankeenna dhaarsan, dhulka daaficiisa,
dhinaca aan ka raacnoo, hubka dhabarka saarree,

Soo dhaqaaqaay!

Maanta waa dhabtiiyoo, dheeldheel ma joogtee,
Cadawga aan dharbaaxnee,

Soo dhaqaaqaay!

Guushu waa dhankeenno, Sharcigaa dhigaayee,
Gardarrada dharaarta ah, dib u dhowran maynnee,

Soo dhaqaaqaay!

Dhulkii aan lahayn iyo, aan Hawaash dhex geynnoo,
Calankeenna u dhiibnoo, hadalkaba dhammaynnee,

Soo dhaqaaqaay!

## KUWA DAANKA BUUXSADEY — 1964

In kastoo tawraddeenna dhalashadeedii aan dhiig ku daadan, taariikhda adduunka way ku yar yihiin tawrado hantiwadaag ah oo nabadgelyo ku dhashay. Maxaa yeelay, weligeed dagaalku wuxuu ka dhexeeyaa inta ka fa'idaysata dadka korkiisa iyo inta caydha ah. Marka mabda' isu keenaya labada qolo ma jiro, maxaa wacay, qolo waxay rabtaa wax wada cunid, sinnaan, garsoor iyo caddaalad; kuwa kalena waxay doonayaan intaas wax ka soo hor jeeda oo ah hantigoosad oo dabada ku wada caddaalad la'aan, kala sarrayn, sinnaan la'aan, gaajo, cudur, aqoondarro iyo kala tag! Marka waxay heestu sheegaysaa, inaan jid kale u furnayn Soomaalida dagaal ma ahee.

— Shacbiyohow danteennii innagaa daboollee dad xaqiisa waayaa dunidaba ma joogee, innagays dilaynnee ma dagaal gelaynnaa.

Kuwa daanka buuxsaday ma ka daadinaynnaa!

— Duruqaanka leegada ku dawoobimaynnee dulmigii horeetaa lagu duudsiyaayaa, innagays dilaynnee ma dagaal gelaynnaa.

Kuwa daanka buuxsaday ma ka daadinaynnaa!

— Waa kaa dadkeennii gaajada la daatee dumarkiyo carruurtii dalanbaabiyaaye, innagays dilaynnee ma dagaal gelaynnaa.

Kuwa daanka buuxsaday ma ka daadinaynnaa!

— Ruux hilib dad cunaya deris lagama yeeshoo bahal aan ku daynayn dusha laguma qaatee, innagays dilaynnee ma dagaal gelaynnaa.

— Waa iga dardaarane ka dareemanaadoo kuwo aan

— Waa iga dardaarane ka dareemanaadoo kuwo aan dawa lahayn dib hawgu dhowaannina.

## HOY JABUUTAAY — 11-1-1967

Jabuuti waa Dal Soomaaliyeed oo ka mid ah shantii qaybood ee laynoo kala jarjaray. Innana waan ognahay arrimahaas gumeysiguna wuu ogyahay. Markuu De Gol oo madaxweyne u ahaa Faransiiska yiri «Taladaan waxayna dhaafsanayn bishimaha caaraddooda». Waxaa inala gudbooneyd, waajibna inagu ahayd, inaan ugu jawaabno: Iska jira cadawga iyo gumeystaha! Waxaase, isweyddiin leh, «Maxaa Faransiisku u haystaa Jabuuti?» Haddaad xusuusato dagaalladii geesigii Soomaaliyeed Axmed Gurey iyo gumeystaha Xabashida oy gumeystaha Yurubta Galbeed ugu hiillinayey, una garab galyeynayey, waad garan kartaa, waxa Jabuuti ka haysta xornnimadeeda.

Waxaa la yiri, «Qaan ninkii lahaa u qaylinayo ma qurunto»! Runi runteed bay tegi goor ay noqotaba. Jabuutina way xoroobi doontaa maalin maalmaha ka mid ah. Waxay ahayd bay ahaan doontaa, inkastoo gumeysigu magacyo kala duwan bixiyo.

Xornimo waa loo jahaa-
daa,
jaad iyo jiif laguma hele-
yee,
haddaan jilibka loo dhigin,
isticmaar kaama joogee,
iska jir cadawga kula jecel,
inaad jabtoo, oodan
joogsan,

Hoy Jabuutay!

Gumeysi inuu jermaadiyo,
inuu gurigiinna joogo,
afkii Jeneral De Gol baa,
dardaaran idiinku jeedshee,
iska jir cadawga kula jecel
inaad jabto oodan joogsan

Hoy Jabuutay!

Haddaad jilbiskiyo abee-
sada,
Jar iyo laaleys ka tuurtaan,
oo jillowdooda aad u goy-
saan,
jintiinnaad maali doontaan,
iska jir cadawga kula jecel,
inaad jabto oodan joogsan,

Hoy Jabuutay!

Jannada inaad doorataan,
iyo inaad jahannamo gale-
ysaan,
Juulay iyo Juun dhexdooda,
jawaab laydin ka sugayaa,
iska jir cadawga kula jecel,
inaad jabto oodan joogsan,

Hoy Jabuutay!

## WAY GARANAYAAN — 25-1-1976

Dadyowga gacanta gumeysiga ku jira way garanayaan labada u gudboon geeri iyo nolol.

*«Nin dharbaaxo quureed dugsaday dhaqayadeed maalye,*
*Shashaaday sugtaa xaajadaad dhowrataa abide,*
*Haddaad dhimato geeridu mar bay nolosha dhaantaye,*
*dhaqankiyo mar bay kaa yihiin dheregtu xaaraane!».*
*...... Cali Dhuux baa tixahaas yiri.*

Gumeysiga xeeladihiisu way badan yihiin, qaarkood waxay ku dadaalaan inay nolol beenbeen ah ku tusaan, oo aan lahayn dhaxal dambe? Haddaba way ogyihiin oo way kala garanayaan xornnimada saboolnnimada leh iyo gunnimada dheregta leh. «Gobannimo aad u gaajootay waxay ka doorroon tahay hodannimo iyo barwaaqo gumeysi leh!». Jaalle Siyaad ayaa yiri 11kii Sateembar 1970kii isagoo Ummadda la hadlayey.

Gobannimada qaata, gumeysigana diida,
kala gooni weeyee, way raganayaan,
laba u gudboon, geeri iyo nolol

Guullow Allow gaarsii xornimo!

Labadan isgargaartay, garab haw noqdeene,
gacalkeenni weeyaane, way gargnayaan,
labada u gudboon, geeri iyo nolol,

Guullow Allow gaarsii xornimo!

Kuwaa gibisha tuuree, ka gilgishay xumaantow,
guntiga isku giijaay, way garanayaan,
labada, u gudboon, geeri iyo nolol,

Guullow Allow gaarsii xornimo!

Gaashaanka u darruuroo, xariggana u gooyo,
gobannimo ku waaraay, way garanayaan,
labada u gudboon, geeri iyo nolol,

Guullow Allow gaarsii xornimo!

ADDUUNYADA NIN HAABTOW — 2219-1967

Heestani waxay ina xusuusinaysaa dhimasho iyo aakhiro, ulajeeddadeeduse ma aha, inaan cabsi idin geliyo ama aan idinka nixiyo oo aan adduunka idin nacsiiyo oo aakhiro keliya ha loo shaqeeyo leeyahay.

Waa inaynnaan ku fakarin, sidee lagu helaa maal badan. Maxaa yeelay, waxaan dhib ahayn oo uu inoo leeyahay ma jirto haddaan lagula qabin! Dhibihiisa waxaa ka mid ah: Inaad noqoto tuug ummadda waxeeda hunguri ka galo, ama aad noqoto jaajuus oo dalkaaga aad

iibsato, midda kale hantigoosad baad noqon oo dadka korkiisa ayaad ka faa'iidi doontaa, dhiiggoodana jaqi doontaa naxariis la'aan. Intaas oo dhibihi waxay ka imaan kartaa, markaad ku shaqayso oo aad ku fakartid maal badan yeelo! Waxaan uga dan leeyahay, waad ka dhimanaysaaye iska illow maal oo ku beddel, in dadka Soomaaliyeed wax wada cuno oo wax gaajeysan la waayo! Middaani waxay ka macaan badan tahay raaxo aad keligaa ku noolaatid oo wax kuma taal ah.

| | |
|---|---|
| Adduunyada nin haabtow, | dhammaan kuma heleyside, |
| Markaad hano tiraahdaba, | bar baa haawanaayee, |
| Haruubka u cullaayiyo, | ninkii hore u buuxsaday, |
| Midna kuma haraayoo, | dhammaan way ka wada hoyan, |
| Hillaac been ah weeyoo, | nafta lagu hodaayoo, |
| Hog inaad ka duushay, | kuu hoggaaminaysaa, |
| Adaa haysan doonuun, | ninkii haabka geliyow, |
| Inay kaa horimanoy, | ku heerina ogsoonow, |
| Dadkii hore halkuu maray, | bal taariikhda haybsoo, |
| Inaan laysku haynayn, | hubaasheedu weeyaan, |
| Hagaajiis nin diidow, | inkastood halyey tahay, |
| Inaanad haakah oranayn, | hubaasheeda weeyaan. |

## MA ANOO DHULKAYGII — 12-8-1965

Markii siyaasaddii gumeysiga cusubi, ina hantiday ee aan jaha wareernay, markii waxaan doonaynno iyo waxaan diideynno aan kala garan weyney ayaa waxaa u meel maray isticmaarka tabcadii uu ina la doonayey ee ahayd, inuu siduu doono inaga helo! Innagoo magaca xor ka ahayn iyo Soomaalidii gacanta cadawga ku jirtey intaba gumeysigii ayaa gabagabeeyey.. Waa tii N.F.D. la duudsiyey. Murugo iyo ciil waxaa noqday, markii ummaddiina kala firirtay ee shaqaalihii, dhallintii iyo dadweynihii kale, intaba guri guri ayaa lagu kala ooday. Xoola dhaqatadiina waa laysku diray oo hub ayaa laysugu dhiibay. Siyaasaddaasi waa tabaha gumeysiga «Qaybiyoo xuhun»! Da'dii yarayd markay tumasho gashay oo la habaabiyey, lana dhaqan guuriyey, ayaa waxaa igu soo dhacay fikrad. «Ma anoo dhulkaygii cadaw kala dhantaa-

laan dhagdhag u qoslayaayoon dheelayaa cayaar»! Dad badan oo Soomaali ah oo aan la tirin karin, ayaa sidaas ku dhaqmi jirey. Soomaalidu waxay tiraahdaa «Caano daataba dabadooda ayaa la qabtaa». Dadku maanta ayuu gacmaha is haystaa oo dagaalka isticmaarka iyo eydiisaba meel kaga wada jeedaa, dalka horumarintiisa iyo mabda'a ayaatiinka leh dhisiddiisana uu heegan u yahay.

Ma anoo dhulkaygii, cadaw kala dhantaalaan,
dhagdhag u qoslayaayoo, dheelayaa cayaar,
Ma anoon dhashaydii, dhammi wada xorayn baan,
dhagdhag u qoslayaayoon, dheelayaa cayaar,

Aynnu dhiidhinoo dhiig u daadinnee soo dhaqaaqay.

Ma anoon dhurwaayada, taariikh ka dhiginoo,
dhammidii gumeysiga, dhaadka aan ka xirin baan,
dhagdhag u qoslayaayoon, dheelayaa cayaar,

Aynnu dhiidhinoo dhiig u daadinnee soo dhaqaaqay.

Ma intuu dharaarnimo, Xayle dhaaranaayee,
N. F. D. dhankeedana, dhiilladu ka joogtaan,
Dhagdhag u qoslaayoon, dheelayaa cayaar.

Aynnu dhiidhinoo dhiig u daadinnee soo dhaqaaqay.

Xabashidu dhankeedii, waxba dhowri maysee,
ma intaan dhambaal iyo, Afrikan dhur sugayaan,
dhagdhag u qoslayaayoon, dheelayaa cayaar,

Aynnu dhiidhinoo dhiig u daadinnee soo dhaqaaqay.

Dhinacaa Jabuutina, dhuxulaa shidmaayee,
ma inta dhulkaygii, Faransiis dhex joogan,
dhagdhag u qoslayaayoon, dheelayaa cayaar,

Aynnu dhiidhinoo dhiig u daadinnee soo dhaqaaqay.

## GUNTADAAY! — 8-3-1965

Waa guubaabo guud, dhaqankeennana meel bay kaga jirtaa kaalmada guntaday. Reerka cidi kuma harto, kol haddii la yiraahdo guntaday. Marka laysugu baaqanaa waa marka shaqo ama dagaal loo kacayo. Sow kuma habboona maanta, innagoo dagaallo badan ku jirna; dagaal-

kii gaajada, kii cudurka, kii aqoon la'aanta iyo midka gumeysiga oo dhisaynna hantiwadaagga cilmiga ku dhisan iyo tan u weyn oo ah dhismaha maskaxda dadka. Arrimahaas la'aantood iyo dhaqangelinta waxyaalaha kale waxba inooga hagaagi mayaan, haddii uusan qofku garan wuxuu qabanayo waxay tarayaan, oo dhalin kara faa'iido weyn. Haddaba waxaa inala gudboon, inaan guntiga dhiisha isaga dhigno o gacmaha isqabsanno, innagoo raacaynna tusaalihii Jaalle Siyaad oo ahaa....

«Xooggeenna oo la isu geeyey, la isuguna keenay «Iskaa wax u qabso», wuxuu muujiyey waxtarka ummaddeenna iyo kartideeda oo in door ah daah la saaray.....».

Waa dhab, in wax badan daah layna saaray oo qalbiga laynaga dilay, mar laynagu caayo, «Waxaad tihiin dad caajis ah oon waxba samaysan karin iyo mar laynagu yiraahdo, Dhulkiinnu waxtar ma leh, iyo waxyaalo kale oo la mid ah. Arrimahaasi way beenoobeen indhaheennana ku aragnay ee aan israacinno inta hartay.

Nin geeri diidayaayi,
intuu gorof ku maalo,
giddigeen Soomaalay,
gamaska soo afaystoo,

xornimo gaarimaayee,
gallad kuma dhamaaye,
guduntiyo hangoolkiyo,

Guntaday, Guntaday!

Odayada gaboobiyo,
gabar iyo gambooley,
guduntiyo hangoolkiyo,

kuwa geela raacow,
gabannada kacaayow,
gamaska soo afaystoo,

Guntaday, Guntaday!

Gaashaanka aan daruurro,
gumeysiga ka saarroo,
giddigeen Soomaalay,
gamaska soo afaystoo,

dhulkeenna isu geynnoo,
xididdada u goynnee,
guduntiyo hangoolkiyo,

Guntaday, Guntaday!

Intuu guriba meel yaal, dunida gaarimaynnee,
haddaan gacantu dheeraan, hadal kuna ganaynnee,
giddigeen Soomaalay, guduntiyo hangoolkiyo,
gamaska soo afaystoo,

Guntaday, Guntaday!

## AFRIKA HA KACDO — 1968

Waa loo baahan yahay, inay Afrikaanku arkaan xumaanta gumeysiga. Waxa la yiri «Shimbiriba codkeeday cidaa» Siday iigu muuqatay in Afrika ay ku habboonaan lahayd, waxaa weeye, inay Afrika israacdo oo gumeysiga iska kaashato. Jaalle Siyaad wuxuu yiri 11kii Jan. 1972....

«Kumanyaal Afrikaan ah ayaa naftoodi ku waayey, si ay Afrika ku xoreeyaan, waxayna ku dileen boqollaal kun oo geesiyaal ah gumaystayaasha quranka leh gacantooda mana suurtowdo maanta inaannu dib u noqonno» Sidaas daraaddeed waxaa inagu waajib ah, inaynnu baraarugno oo diyaar u noqonno, sidaynnu ku ilaalin lahayn nabadgelyada iyo gobannimada ummaddeenna.

War wuxuu ku dhan yahay maahmaahdii ahayd, «Nin qorrax kugu dilay har kuuma jiido». Waa run, ma suurowdo, kii shalay dadkaaga laynayey ee u laynayey gobannimo maxaad u doonaysaa, kii dalkaaga qaybinayey ee ulajeeday xooggooda ku kala dhin, yaynan berri danhahaaga wax yeeline — ma suurowdaa — inuu maanta kugu caawimo, sidaad isaga ula sinnaato. Maya! Waxaase suurtowda, in nala ka dhex helo dabadhilifyo u kaalmeeya gumeysiga cusub si ay maal badan ku helaan, iyo si ay dadka ugu addoomiyaan gumaysiga, mabada'a hantigoosadka ahna ay u xoojiyaan.

Kulan aan helloo, kulligeen dhammaan,
kadin wada marree, xilkasnimo koriyo,
Kaalmada Ilaah, isla kaashaannee,

Kolonyaalism ha kuftee kor u dhaha,
Afrikana ha kacdee kulligeed.

Bahal dhiig kabbaday,
kolla kama tagee,
kuududaan kuwii aan nac-
nee,
haddaan laga kaxayn,
kadinkiyo agteennay,

Kolonyaalism ha kuftee kor u dhaha,
Afrikana ha kacdee kulligeed.

Waxa keliyahoon,
sidnaa nin waliba,
halkuu kelligi damcee,
kulligeen innagu kaalka u
kaskii haw maro,

Kolonyaalism ha kuftee kor u dhaha,
Afrikana ha kacdee kulligeed.

## WAA INAAD DIYAALOW U DIGTAA AMXAARADA

Diyaalo Telli wuxuu ahaa Xoghayihii Midowga Afrika ee hore. Nin madax ah weligiis, waa la isula tagaa, markii lays qabto, iyadoo laga sugayo, inuu sidii runta ahayd u garnaqo isagoon eexna samayn eedna gelin!. Markii 1964kii Xabashidu ina soo gardarraysatay ee aynnu cid walba tusaynney daandaansiga laynagu samaynayo, ayaan heeskan tiriyey.

Haddii aad duqii tahay,
xaqa lama dabooloo,
Afrikaanku door biday,
dalab looma yeelee,

Waa inaad Diyaalow u digtaa Amxaarada!

Danwadaagga Afrikada,
Annagoo aan daynayn,
Ee Xayle duudsiyey,
Oo ay daacad naga tahay,

Waa inaad Diyaalow u digtaa Amxaarada!

Nin dadkiisi bahal cunay,
waa ka duuf habeen qura,
Nafi uma dambaysee,
nabad inay ku daaqdee,

Waa inaad Diyaalow u digtaa Amxaarada!

Dacar baa na buuxdoo, soo daadanaysee,
Intaan dunida laga tirin, dunjigeeda Xabashida

Waa inaad Diyaalow u digtaa Amxaarada!

BAL DHOWRA DHOWRAY — 24-6-1965

Ciidanku waa tiirka ugu weyn ee Dal ku taagan yahay. Marka laga reebo dhaqaalaha hadduusan ahayn ciidankaasi mid u shaqeeya gumeysiga oo ka soo hor jeeda danaha dadweynaha, haddaan dib u raacno taariikhda ciidammadeenna, waxay ahayeen kuwo u adeega ummadda.

Xornnimada ka hor marmarka qaarkood, ciidammadeennu waxay ka qayb gelin jireen dhaqdhaqaaqyadii gobannimadoonka ahaa! Kaba soo qaad, dagaalkii ha noolaatadii xornimada gumeysiga Talyaaniga lagula diriray.

Aad buu dadkeennu ugu kalsoonaa dhismihii la dhisay Ciiddanka qalabka sida 1960.

Heestan soo socota, waxay muujinaysaa niyadsamida uu u qabo qof kasta oo Soomaali ah haddii lagala hadlo Askarta Soomaaliyeed. Bal xasuusta 1964kii weerarradii cadawga waxay ku dhigeen. Xusuusta 21kii Oktoobar 1969, subaxdii Talaadada markay inaga dhiciyeen xaaraan quutayaashii xaqirayey dadweynaha waxa inoo caddaatay, in ciidankeennu yahay kii dadka u shaqaynayey, gumeysigana ka hor jeedey.

Haddaa la dhaaboo, Ciidanku dhaartoo,
Dhismo hagaagsan, yaa loo dhammeeyee,
Cadow dhulkeenna, cagtiisa dhuuban,
Ma soo dhigaayoo, Dhammaan Dalkeenna,
Inaannu dhawrraa, Nalagu dhaarshee,
Xil aan dhammaan baan, Dhabarka saarroo,

Dheeldheeli maynnee maxaa dhinnaaday!

Wixii dhibaato,
Inaan dhammaynnaa,
Calanka dheehan,
Nalagu dhaarshee,
Dhasheenna joogtaa,
Xil aan dhammaan baan,
Gumeysi dhaafay,
Nalagu dhaarshee,
inaannu dhowrraa,
Dhulka la haystoo,
Nalagu dhaarshoo,
Dhabarka saarroo,

Dheeldheeli maynne maxaa dhinnaaday!

Habeyn dhammaaday,
dhexdooda weeyaan,
dhidibka xooggu,
Ku dhaadanaysee,
ay dhiida gaartay,
Xil aan dhammaan baan,
dharaar caddaatay,
halkaynnu dhaafnee,
waa kii dhasheennu,
waa kii dharaartii,
cadow dhammeeyee,
dhabarka saarroo,

Dheeldheeli maynne maxaa dhinnaaday!

## KUWII HORE INOO GUBEY
## HADDANA HAW GARGAARINA — 1969

Reer miyigu markuu guri ku abaarsado, geeddi baa loogu taliyaa. Ujeeddada guuristaasi waxay tahay in xoolaha meel bàad iyo biyaba leh la geeyo. Markii hiirta waaberi gaadiidka la saaro aqalka ee uu maalintaasoo dhan socod ku jiro, marka harku gondaha qofka ku ururo duhrurkii, carruurtu waxay u baahataa caano iyo biyo. Markaasaa waxa iyaga lagu maaweeliyaa horta reerku ha dego, waxaana la tusaa dhallaan habaabis ka dhasha kulaylka cadceedda oo sheeddeeda la moodo biyo. Sidaasoo kale ayay dibutaatooyinka doorasho ku sheeggii ku maaweelin jireen dadka oo la oran jirey «Markii nala soo doorto ayaan wax walba hagaajin doonnaa»! Sidaas ayaa dadweynaha lagu dhagri jirey! Heestani waxay ku saabsan tahay doorashooyinkii dhalanteedka ahaa.

Gacantiinna midigta ah,
garaadkiinna raacoo,
dadyow haysku gawricin,
gadaal wax u xusuustoo,

Kuwii hore inoo gubay haddana haw gargaarina!

Inaan geeri iyo nolol, miduun gaaro weeyee,
haddaan geesna loo dhicin, ma guulaysanaynnee,

Kuwii hore inoo gubay haddana haw gargaarina!

Adiga oo garaad qaba, amley lagugu gawraco,
galka lagama siibtoo, hanaqa laysma gooyee,

Kuwii hore inoo gubay haddana haw gargaarina!

Waa taa garwadihii, geeddigii habowshee,
gumaystihii Amxaarada, gacan qaad la yeeshee,

Kuwii hore inoo gubay haddana haw gargaarina!

Kuwii golaha weyn iyo, Barlamaanka noo galay
Gafuur taagiddodaa, gallad moodimaynnee,
Wasiir gawsawaynoo, xafiisyada gableeyiyo,

Gelleydaa Maraykaan, Gallad moodimaynnee,

Kuwii hore inoo gubay haddana haw gargaarina!

Kuwii hore inoo gubay haddana haw gargaarina!

Gobannimo la sheegiyo, calan guudka lay suro,
oo aan gaajo naga bi'in, gallad moodimaynnee,

Gacalnimo la sheegtoon, gurigiinna dhaafayn,
oo laysku gawraco, guul kuma heleynnee,

Kuwii hore inoo gubay haddana haw gargaadina!

## AFMIISHAAR — 3-2-1970

Afmiinshaar waayo? Xagguu jiraa? Maxaa lagu gartaa? Afmiinshaarku wuu faro badan yahay, meel walbana wuu ku jiraa.

Waxaa jira afmiinshaar afmiinshaarro samaystay. Kuwaas waxaa ka mid ah: Nin meel madax ka ah oo xuma fale ah ayaa mid ammaanayaa ama u hillinaya, haddii la soo qaado.

Kaasi waa qof qof leh. Meel walba wuu ku jiraa afmiinshaarku. Isagu naftiisa ma aamminsana oo inuu awooddiisa wax ku qaban karana ma moodo. Afmiinshaarka afmiinshaarka lahaa waxuu yiraahda, «Ilaahow hebel wax sii wax hay siiyee, Ilaahow hebel derejo sii hay dalliciyee!» Afmiinshaarka aqoontiisa, aadminimadiisa iyo kartidiisa, intuba, way ka qarsoon yihiin. Maxaa lagu garan karaa, haddii la yiraahdo tilmaamahiisa qofna muu wada tilmaami karo! Maxaa yeelay, suuradihiisa lama wada koobi karo! Wax kasta oo xun wuu ku suuroobaa, doofar meel buu uga egyahay: «Waa fici la'aanta oo kama qiiroodo, inuu qof isagoo kale ah dabadhilif u noqdo!» Afmiinshaarku wuxuu af yaqaannaa dabadhilifka gumeysiga amarkiisa keliya ku socda, garasha kalena ma lah.

Maalintii uu cad hilib ah ka waayo dabadhilifka, wuu ka tagaa afmiinshaarku. Hadduu maalin wax siin waayo kii dirsan jirey, isaguu caayaa marka dambe illeen awalba dhuuniraac buu ahaaye! Iyadoon la dhammayn karin sifaalihiisa waxaan wax kaga tilmaamayaa heestan.

Nimaan abidkii arooryo toosin,
oo aan ogaynba adaygga nolosha
aragga guudkana la amakaagto,
Afmiinshaar umuurihiisa wada ogaada!

Imaanka qaar la' oo ikhyaar la moodo,
mar ciidda iibshoo ubadka dooxa,
adduun ninkii lena Ilaah ka yeesha,
Afmiinshaar umuurihiisa wada ogaada!

Qaar been afuufoo dunida olosha,
oo dadka alhuumiyo argagax geliya
sidaas ammaan iyo abaalku doona,
Afmiinshaar umuurihiisa wada ogaada!

Dad aan abiidkood ururka
doonin, oo ku istareexa annaani-
yeyska,
laba afleyda sida abeeska,

Afmiinshaar umuurihiisa wada ogaada!

## HA HAKANNINA — 4-4-1970

Taariikhdu waxay ina bartay, in waxa dadka intiisa badani dooneyso, inay yihiin wixii dan ah, oo ay u baahan yihiin madax daacad ah ee u fulisa waxay doonayaan oo tiraahda sidaas yeela, sidaasna wax u qabta! Markaas ayuu dadweynuhu wadan karaa hawshiisa, illeyn waa sidey rabeene! Madaxda iyo dadku waa inay wada socdaan oo ay iska war hayaan, si aan loogu kala sheekayn! Madaxdu waa inay ku kalsoonaataa ama ku dhiirrataa waxa ay qabanayso; haddii kale, waxaa suurowda, in shaki kala galo oo ayba is yiraahdaan, malaha raalliba lagaama aha, sidaad wax u waddaan! Madaxdu waxay u baahan tahay garab iyo taageero af iyo addinba leh, haddii ay wax qumman qabtaan, illeyn iyaguba dagaal bay la galeen gumaysiga iyo dhiigmiiratada dad cunka ah labadaba; iyagoo u hiillinaya xoogsatada, beeraleyda, iyo inta saboolka ah oo dhan. Haddaba ma jirto sabab keenta hakasho aan ka hakanno horusocodka, dhismaha dalkeenna iyo aayatiinka dhasheennaba! Hakasho aan ka hakanno baabi'inta gumeysiga iyo la dagaallanka dibusocodka hantigoosadatada ah ee iimaanka daran, waxay keeni kartaa dhibaatooyin la mid ah kuwii hore aannu u soo marnay kacaankeenna ka hor!

Ummaddaa hortiinniyo, hareerihiinna socotoo,
heeganoo cadaawaha, badda ku hafinaysee,
Ha hakanninee hilinka, toosan noo hor seedoo noo
hogaanshay!

Haarihii gumeysiga, iyo hororradii xigey,
durba aan hilmaanno, hiigsanno adduunkee,
Ha hakanninee hilinka, toosan noo hor seedoo noo
hogaanshay!

Hantidoon wadaagniyo,
hubka weeye gaajada,
ha hakanninee hilinka,
hawshoo mid loo yahay,
waxba aan hambaynnine,
tooson noo hor seedoo noo
hogaanshay!

Geesigu halbowlaha,
beelaha hayaamee,
Ha hakanninee hilinka,
horusocodka weeyee,
horumaray aan gaarree,
toosan noo hor seedoo noo
hogaanshay!

## KOL HADDII GUULEYSTAYAAL GEEDDIGII LA WADAY — 6-1-1970

Sheekaba sheekay keentaa ee xusuusta geeddiga waday! Si fiican baad u garan kartaan ujeeddada heestan. Heestani waxay caddaynaysaa, inuu geeddigii socday oo uu guure yahay ee galab carraw yahay. Waxaa garan kara ujeeddadan kii gobannimada jecel; kaan garwaaqsanina, waa gumeyste ama waa gacal cadaawe! In shaqo loo guntaday oo la guddoonsaday; in gunta laga jaro geedka gaajada; kaan u guuxinu waa rì geesa la', in qabiil guray gabbalkiisna dhacay oo uu gabaabsaday dadku wada garay gooni daaq iyo gaade mooyee! Waxa guraayoo geerida u dhow waa hantigooste! Kan u gocleeyow musuqmasuqii baa adduun u go'i! Geeddigii socay, guuro bahallee, gaabsigi diid oo gu' buu shansaday, kii gaabinaayow aduun baa go'ay!

Kol haddii gulleystayaal,
oo uu guure yahay,
kii garanayee gobannimada
jecel,
geeddigi la waday,
iyo galab carraw,
hadduu caawa go'o,

Godka wuu ku ledi!

Kol haddii guuleystayaal,
oo gaajadii gunta inaan ka
jarro,
kii ganarayee gobannimada
jecel,
shaqo loo guntaday,
uu guddoonku yahay,

Hadduu caawa go'o godka wuu ku kedi!

Kol haddii guuleystayaal, oon garashi iyo gacal baynnu nahay, kii garanayee gobannimada jecel,
eexadi la gubay, laysugu guntayn,

Hadduu caawa go'o godka wuu ku kedi!

Kol haddii guuleystayaal, oo ay kuwii ku gabraaran jirey, kii garanayee gobannimada jecel,
uu qabiilki guray, guuldaran yihiin,

Hadduu caawa go'o godka wuu ku ledi!

## DHARKEENNA IYO DHUUNIGEENNA
21-10-1970

Dal hadduusan dhaqaalihiisa ka shaqayn hore uma mari karo. Horuumarka dalka yaa ka shaqeeya? Dawladda keligeed miyaa shaqo laga sugaa? Maya, qof kasta oo Soomaali ah ayaa laga doonayaa! Sidee looga doonayaa? Ruux kasta oo naga mid ah, waxaa la gudboon, inuu meeshiisa dhaqaaleeyo! Markaan dhar gadanaynno midka u lacag yar iibso. Waxay ila tahay, inaan dharka qaaliga ah ama quruxda badni, inuusan qofka wax ku kordhinayn waxna ka ridayn. Haddaan faahfaahinno arrintaas qof xun oo tuug ah ama khaayin ah oo aad taqaan dharka dhar u qaalisan una qurux badan, hadduu xirto, waa kii uun ee waxba kuma kordhin. Sidoo kale, ruux la yaqaan, inuu wanaagsan yahay hadduu lebbisto dhar raqiis ah, ma wax baa ka dhacay wanaaggiisii? Maya. Dhuuniga xaggiisa dad baa ka faana soorta, muufada, digirta, cambuulada, daangada, meseggada iwm; oo ku faana bariiska, baastada, burka ka yimaada dalal shisheeye! Haddaynnaan waxeenna cunin, yaa cunaya? Maahmaah baa tiraahda, «dantiisa mooge mara duug ah; horteed ayuu dhammaadaa!» Aan ku hammino, sidaan mugdiga uga bixi lahayn oo aan magaalooyinkeenna u wada iftiimin lahayn. Aan ku fekerro, sidaan uga bixi lahayn guryaha maalintiina kulul, habeenkiina qabow (carrishka iyo baraakooyinka).

Dhaldhalaalka beenta, ee dhaqaalaheenna dhaawacaya,
aynnu dhaafnoy,

Dharkeenna iyo dhuunigeenna aynnu ku dhaadannoy!

Dhaldhalaalka beenta, ee dhasheenna maanta
dhalan rogaaya, aynnu dhaafnoy,

Dharkeenna iyo dhuunigeenna aynnu ku dhaadannoy!

Dhaldhalaalka beenta, ee shisheeye dhaartay,
nagu dhacaayo, aynnu dhaafony,

Dharkeenna iyo dhuunigeenna aynnu ku dhaadannoy!

## TAARIIKHDU WAA DHAXAL — 1971

Waa run, in taariikhdu dhaxal tahay. Iyadu waxay tahay macallin dadyowga wax bara. Taariikhdeennu waxay inoo ka sheekaysaa dhowr muddo oo taariikh ah.

1. Muddadii Axmed Gurey (1400 - 1500).
2. Muddadii Daraawiishta (1900 - 1922).
3. Muddadii dhaqdhaqaadi gobannimadoonka ahaa (1943 - 1960).
4. Muddadii musuqmaasuqa (1960 - 1969).

Intaan oo muddooyin ah, mid waliba waxay dadkeenna baraysaa hadba heerkuu dadkeennu marayey. Taariikhdeennu waa kayd iyo dhaxal inoo yaalla oo aan marna dadkeennu halmaami karin.

## DAGAALKII DHAGAXTUUR — 1947

Dadyahow dayay gumeysiga, dantii waa inuu wax dilaaye,
Dadyahow dayay gumeysiga, dantii waa dushaada aan fuulee,
Dadyahow dayay gumeysiga, dantii waa damaaci ku noole,
Dadyahow dayay gumeysiga, dantii waa dal aanu lahayn,
Dadyahow dayay.

Waxaannu dooneynnaa inaan dulmigiinna idlaynnee,
Waxaannuu dooneynnaa inaan dadkayaga midaynnee,
Waxaannu dooneynnaa inaan dusha sare marnaayee,
Waxaannu dooneynnaa inaan dunida baal ka raacnee,
Dil iyo xarig dib uga laabanmaynnee,
Duufiaal adaa dusha nagaga yimid, degdeg nooga guur.

1960kii

Waa maalintaan la midoynay adduunkee,
Waa maalintaan midnimada abaabullee,
Waa maalintaan gumeysiga muquuninnee,
Waa maalintaan magacii bi'ii miidaaminnee,
Waa maalintaan murugo iyo ciil meel kaga tagnee,
Waa maalintaan farxad loo midyahay meel kula dhacnee.

10kii sanoo musuqmaasuqa ahayd.
aah aah aah aah.

Taariikhdu dadkay bartaa dunida waayeheedee,
Taariikhdu dadkay bartaa waxay dorraad mareene,
Taariikhdu dadkay bartaa inay dantood gartaane,
Taariikhdu dadkay bartaa inay dowga toosan maraane,
Ninna ma doonto ninna ma diidee runtay dacal ku hay-
saa dadow dadow.

Soomaalay docdeenna, dagaalkii isticmaarku,

Soomaalay docdeennaa sow dorraad ma ahayn!

Soomaalya docdeennaa, dibbirkii wax cunaayey,

Soomaalay docdeennaa sow dorraad ma ahayn!

Soomaalay docdeennaa, dibindaabiyo ciilba,

Soomaalay docdeennaa sow dorraad ma ahayn!

Soomaalay docdeennaa, qaar dantood u shaqaysta,

Soomaalay docdeennaa sow dorraad ma ahayn!

Taariikhdu dadkay bartaa dunida waayeheedee,
Ninna ma doonto ninna ma diidee runtay dacal ku haysaa,

Dadow, dadow.

## KACAANKII 21 OKTOOBAR 1969

Inaynnu dawlad ahaanno,
oo aan dalkeenna lahaanno,
inaan dalkeenna lahaanno,
oo aan shisheeye u diidno,

ayaannu dooneynnaa!

Inuu dadkeennu sinnaado,
oo aynnu diidno danayste,
Inaynnu diidno daneyste,
oo aynnu hawl ku dadaallo,

ayaannu dooneynnaa!

Inaynnu daacad ahaanno,
oo aan danteenna aqoonno,
inaan danteenna aqoonno,
oo aan dadaallo, dadaallo,

ayaannu dooneynnaa!

aan ubax dushiinna,
ku daadinnee daa'imkayo abidkayee,
dib haw laabanninay,
aannu doonno danteenna,
aynnu diidno dugaagga,

aan docdiinna ahaanno, daa'imkayo abidkayee,
dib haw laabanninay,
aannu daweynno dadkeenna, aynnu gaajo u
diidnee, dib haw laabanninay!

Aan duco dushiinna u soo dirree,
daa'imkayo abidkayee, dib haw laabanninay,
aynnu diidno dugaaggan aynnu doonno danteenna,
aynnu daweynno dadkeenna, aynnu gaajo u diidnee,
dib haw laabanninay!

JAALLE SIYAAD - 21-10-1971

S. arnawadaha
I. Ilaashaha
A. arrimaha
D. dalkeenna.

Qof alla qofkii xil la saaray, amaba isagu isa saaray oo sidii habboonayd uga baxa xilkiisa wax kastaba ha ahaadee, waa qof waddani ah. Haddaad qof saanac ah u dhiibato shaqo - ka soo qaad nin guryaha dhisa - markuu sidaad dooneysey kuugu dhiso, ama uu dhiidhiiba ku daro waad ku faraxdaa oo waxaad tiraahdaa, hebel waa qof hagaagsan, dadkoo dhanna waad u sheegtaa kartidiisa wanaagsan. Waxaad tiraahdaa, «Waxaan hayaa nin aammin ah oo farsamo wanaagsan oon hagarta aqoon ee wax ha idiin dhiso».

Qofkii markaas ayuu caan wada noqdaa oo aammaanadiisa ku liibaanaa.

Kan xun oo caajiska ah ee beenlowga ah laalaabashada badanna, wuxuu maalin sheegtaa bukto, maalinna wuxuu yiraahdaa hooyaday baa dhimatay iwm. Qofka farsamadiisa aan loo bogin, wuxuu mutaysan yahay habaar iyo cay. Gacantu ku go'day, balaayo wax kuu dhiibatay iwm., ayaa lagu habaaraa. Qofkaas waa laysaga wada digaa dhagartiisa. Haddaba madax wanaagsan oo ka shaqaysa danaha dadweynaha, oo wax u maamusha si raalli laga yahay, in yar mooyee, miyayan inaga mudnayn sharaf iyo ammaanba? Jawaabtu waxaa weeye «haah» Sifooyinkaas wanwanaagsan ayaa lagaga dayan karaa Jaalle Maxamed Siyaad Barre, madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, iyo Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka. Sidaad daraaddeed ayaan u siiyey tilmaamahan magaca SIYAAD.

Ha iilan ha iilan nacabku ha abaadee ha iilan
Aan asaaggeen raacnee ha iilan, nabadda aan adkaynnee, ha iilan.
Gardarrada aan oodnee ha iilan, gumeysi ha idlaadee ha iilan.

Gaajo ha na deysee ha iilan, urur aynnu gaarree ha iilan,
Beenta aynnu aasnee ha iilan, runtu ha istaagtee, ha iilan,

Dadku ha ekaadee ha iilan, aqoontu ha iftiintee ha iilan,
S.I.A.D.: Samawadaha, Ilaashaha, Arrimaha, Dalkeennow ha iilan,

ha iilan nacabku ha abaadee ha iilan.

## HEESTA XOOGSATADA ADDUUNKA

### (Internasiyonaal)

Danyartii dulmigu uu dilaayee,
Daranyiyoo silica dugsanaysay,
Isku duubma oo danteenna weyn,
U darbada dagaalladaa - aa,
Dani cusub ayaa inoo dihin,
Dad cun iyo danayste aan lahayn,
Soo dareera gaajaan doorinnee.

Beeraleey shaqaale iyo ciidan,
Da'yarliyo kan duunyada dhaqaaya,
Isku duubnideen dadweynahow,
Aan daryeello danaheennaa - aa,
Dib u ahaca maskaxdana dawee,
Dabarradii aynnu daadinnee,
Danqannee dibbirayaalka,
Aan ka dabbaallo dhiigga dadkoy cabbaan.

Hawldabraha shaqada doorinaayee,
Dawayee horusocodka diiddan,
Aynnu dayrinnoo dir xumayaalka,
Ka durkinno dadweynahaa - aa,
Farxad bay daruuruhu la di'i,
Ubax cas ayay dillaacayaan,
Dooddii danta wanaagsan baa,
Degdeg - degdeg noogu iimaan - aan.

Doodambe naloo dagimaayo,
Daw cusub baan doorannay,
Oo caddaalad noo dirayoo - oo
Sinni noo daryeelaayee,
Doodambe naloo dagimaayo,
Daw cusub baan doorannay,
Internasiyonaalaa adduunyadaw adkaan.